# XEER-HOOSAADKA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND

# PUNTLAND HoR RULES OF PROCEDURES

## LUULIYO, 2021

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/35/2021 Garoowe, Axad, Taariikh:- 04/07/2021

Ku: - Dhammaan Xubnaha Golaha Wakiillada DPL Garoowe
Og:- Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada Garoowe

Ujeeddo:-**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY: -** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka 64-aad

**MARKUU ARKAY:-** Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada DPL Qodobadiisa 8-aad, 74-aad(2) iyo 75-aad.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Muhiimadda ay leedahay in wax-ka-bedel iyo kaabis lagu sameeyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Soo jeedinta Guddiga Shuruucda iyo Caddaaladda Golaha Wakiillada ee qodobada wax-ka-bedelka lagu sameeyey.

**MARKUU ARKAY:-** Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 48-aad fadhigiisa 10-aad ee 04/07/2021 ay cod aqlabiyad oo gacan taag ah (**38**) Mudane ku ansixiyeen wax-ka-bedelka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada, halka (**10**) mudane diidey, ayna ka aamuseen (**4**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY: -**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

## TUSMO BOGGA

EREY BIXIN....................................................................1
CUTUBKA 1-AAD: XEER-HOOSAADKA GOLAHA WAKIILLADA .................................................................... 3
QODOBKA 1-AAD: XEER-HOOSAADKA GOLAHA WAKIILLADA ....................................................................3
QODOBKA 2-AAD: GOLAHA WAKIILLADA ......................3
QODOBKA 3 - AAD: ........................................................ 5,6,7
AWOODAHA GOLAHA WAKIILADA DPL ...................... 5,6,7
QODOBKA 4-AAD: DHAARINTA XILKA .............................8
CUTUBKA 2-AAD ................................................................ 8
Kalfadhiga Koowaad ee Golaha Wakiillada ......................8
QODOBKA 5-AAD ................................................................ 8
Kalfadhiga Koowaad ee Golaha Wakiillada ......................8
QODOBKA 6-AAD: ........................................................ 10
HABKA DOORASHADA LABADA GUDDOOMIYE KU-XIGEEN ........................................................................ 10
CUTUBKA 3-AAD ................................................................ 11
GUDDOONKA GOLAHA WAKIILLADA .............................11
QODOBKA 7-AAD:............................................................. 11
GUDDOONKA GOLAHA WAKIILLADA .............................11
QODOBKA 8-AAD ...............................................................11
WAAJIBAADKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA ......................................................................11

QODOBKA 9-AAD: ............................................................14
XILKA GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA 1-AAD IYO 2-AAD ............................................................14
QODOBAKA 10-AAD ............................................................15
XIL-WAAYIDDA GUDDOOMIYAHA & GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA ............................................................15
QODOBKA 11-AAD............................................................16
GUDDIGA JOOGTADA AH............................................................16
QODOBKA 12-AAD ............................................................17
DOORASHADA XUBNAHA GUDDIGA JOOGTADA AH ......17
QODOBKA 13-AAD............................................................18
XILKA GUDDIGA JOOGTADA AH............................................................18
QODOBKA 14-AAD ............................................................ 19
SHIRARKA GUDDIGA JOOGTADA AH............................. 19
QODOBKA 15-AAD ............................................................ 19
SHURUUDAHA LAGU LUMIN KARO XUBINNIMADA GUDDIGA JOOGTADA AH............................................................ 19
CUTUBKA 4-AAD............................................................ 20
XUBNAHA GOLAHA WAKIILLADA .................................. 20
QODOBKA 16-AAD............................................................ 20
WAAJIBAADKA WAKIILNIMO EE XUBNAHA GOLAHA .... 20
QODOBKA 17-AAD ............................................................ 21
XUQUUQDA XUBNAHA GOLAHA.................................... 21
QODOBKA 18-AAD............................................................ 22

LUMINTA XUBINNIMADA GOLAHA ................................ 22
QODOBKA 19-AAD ............................................................ 23
XASAANADDA XUBNAHA ............................................... 23
QODOBKA 20-AAD............................................................ 24
IMAANSHAHA KALFADHIYADA GOLAHA .................... 24
QODOBKA 21-AAD ............................................................ 25
LEBISKA IYO HAYBADDA XILDHIBAANKA ................ 25
QODOBKA 22-AAD............................................................ 25
HANNAANKA HAWL SOCODSIINTA GOLAHA ........... 25
QODOBKA 23-AAD ............................................................ 27
HAB DHAQANKA XUBNAHA GOLAHA WAKIILLADA ....... 27
HORUMARINTA IYO KOR U QAADISTA QIYAMKA GOLAHA WAKIILLADA ........................................................ 27
QODOBKA 24-AAD ............................................................ 27
ADEEGSIGA AWOODDA ..................................................... 27
QODOBKA 25-AAD............................................................ 28
XIL-GUDASHO ..................................................................... 28
QODOBKA 26-AAD............................................................ 28
ILAALINTA HEYBADDA IYO SHARAFTA GOLAHA ......28
QODOBKA 27-AAD ............................................................ 28
ILAALINTA XOGAHA SIRTA AH........................................ 28
QODOBKA 28-AAD ............................................................ 29
KA FOGAANSHAHA ABUURIDDA COLAAD DADWEYNE ..... 29
QODOBKA 29-AAD............................................................ 30

ANSHAX-MARINTA MUDANAYAASHA .......................... 30
QODOBKA 30-AAD ............................................................ 30
KA JOOJINTA FADHIYADDA ........................................ 30
QODOBKA 31-AAD............................................................ 31
DIGNIIN AFEED ................................................................ 31
QODOBKA 32-AAD............................................................ 32
DIGNIIN QORAALEED.................................................... 32
QODOBKA 33-AAD............................................................ 33
KA JOOJINTA DOODDA................................................... 33
QODOBKA 34-AAD............................................................ 33
KA SAARISTA MADASHA ............................................... 33
QODOBKA 35-AAD ............................................................ 33
KA JOOJINTA FADHIYADA ............................................. 33
QODOBKA 36-AAD............................................................ 34
KA DOODIDDA IYO GO'AAN KA GAARISTA
XUBINNIMADA MUDANAHA ........................................ 34
CUTUBKA 5-AAD:............................................................. 34
MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU-XIGEENKA DPL ....34
QODOBKA 37-AAD............................................................ 34
DOORASHADA MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE
KU-XIGEENKA ................................................................. 34
QODOBKA 38-AAD............................................................ 35
XIL-KA-QAADISTA MADAXWEYNAHA IYO
MADAXWEYNE KU - XIGEENKA .................................... 35

QODOBKA 39-AAD........................................................................ 36
DHAARTA MADAXWEYNAHA IYO MAXADWEYNE KU-XIGEENKA DPL............................................................................ 36
QODOBKA 40-AAD........................................................................ 36
BANNAANAANTA XILKA MADAXWEYNAHA .............. 36
QODOBKA 41-AAD........................................................................ 37
IMAANSHAHA MADAXWEYNAHA EE KALFADHIYADA GOLAHA ............................................................................ 37
CUTUBKA 6-AAD........................................................................ 38
KALFADHIYADA GOLAHA WAKIILLADA ....................... 38
QODOBKA 42-AAD ........................................................................ 38
KALFADHIYADA GOLAHA .................................................. 38
QODOBKA 43-AAD ........................................................................ 39
KALFADHIYADA AAN CAADIGA AHAYN EE GOLAHA WAKIILLADA ........................................................................ 39
QODOBKA 44-AAD........................................................................ 39
Ajandaha Kalfadhiga aan Caadiga Ahayn ..................... 39
QODOBKA 45-AAD........................................................................ 40
HABSAMI U SOCODKA HAWLAHA GOLAHA ............... 40
QODOBKA 46-AAD........................................................................ 40
TIRADA (QUORUM)........................................................................ 40
QODOBKA 47-AAD........................................................................ 41
COD-BIXINTA ........................................................................ 41
QODOBKA 48-AAD........................................................................ 42

HABKA DOODAHA GOLAHA ........................................... 42
QODOBKA 49-AAD ............................................................ 44
KHUDBADAHA ..................................................................... 44
QODOBKA 50-AAD............................................................. 45
DHEX-GAL TOOSINEED.................................................... 45
QODOBKA 51-AAD............................................................. 45
XAQA JAWAAB-CELINTA XUBNAHA .............................. 45
QODOBKA 52-AAD ............................................................ 46
WARBIXINNADA WASIIRADA ......................................... 46
QODOBKA 53-AAD............................................................. 46
NIDAAMKA FADHIGA GOLAHA ....................................... 46
QODOBKA 54-AAD ............................................................ 47
DAAH-FURNAANTA FADHIYADA GOLAHA ................ 47
QODOBKA 55-AAD ............................................................ 48
AMNIGA XARUNTA GOLAHA ......................................... 48
QODOBKA 56-AAD............................................................. 49
KAYDINTA IYO XAFIDAADDA QORAALLADA FADHIYADA GOLAHA ........................................................ 49
CUTUBKA 7-AAD:............................................................... 50
CURINTA HINDISE SHARCIYEEDKA .............................. 50
QODOBKA 57-AAD ............................................................ 50
SOO BANDHIGIDDA HINDISE SHARCIYEED ............. 50
QODOBKA 58-AAD............................................................. 51
AKHRINTA HINDISE SHARCIYEEDKA .......................... 51

QODOBKA 59-AAD ........................................................... 52
HINDISE SHARCIYEED SUGAYA SAXIIX ........................ 52
QODOBKA 60-AAD........................................................... 52
XEER LA DIIDEY ............................................................ 52
QODOBKA 61-AAD........................................................... 52
DAABACAADDA IYO KAYDINTA XEERARKA .............. 52
CUTUBKA 8-AAD: ........................................................... 53
GUDDIYADA GOLAHA .................................................. 53
QODOBKA 62-AAD........................................................... 53
GUDDIYADA GOLAHA WAKIILLADA ............................ 53
62.1: GUDDIGA SHURUUCDA, .......................................... 54
CADDAALADDA, ARRIMAHA DIINTA IYO
DASTUURKA ................................................................... 54
62.2 GUDDIGA SIYAASADDA, QORSHEYNTA,
HORUMARINTA DHAQAALAHA & XIRIIRKA
CAALAMIGA AH ............................................................. 55
62.3. GUDDIGA ANSHAXA IYO ARRIMAHA GOLAHA ..... 56
62.4 GUDDIGA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA
IYO DIMUQRAADIYADDA ...............................................57
62.5 GUDDIGA AMNIGA IYO NABADGELYADA ............57
62.6 :GUDDIGA MAALIYADDA, DHAQAALAHA IYO
XISAABAADKA ................................................................ 58
62.7 GUDDIGA HAWLAHA GUUD, GAADIIDKA,
GANACSIGA IYO KAABAYAASHA DHAQAALAHA .......58

62.8 : GUDDIGA ARRIMAHA BULSHADA, DHAQANKA, WARFAAFINTA IYO ISGAARSIINTA ................................ 59
62.9 GUDDIGA ARRIMAHA DEEGAANKA IYO KHAYRAADKA DABIICIGA AH ......................................... 59
62.10 : GUDDIGA XUQUUQDA INSAANKA, ................... 60
HAWEENKA IYO ARRIMAHA QOYSKA .......................... 60
CUTUBKA 9-AAD: ................................................................... 61
HABRAACA MIISAANIYADDA ........................................... 61
QODOBKA 63-AAD ................................................................. 61
HABRAACA LAGU ANSIXINAYO MIISAANIYADDA ... 61
QODOBKA 64-AAD ................................................................. 63
HABKA LOO ANSIXIYO XISAAB-XIRKA MIISAANIYADDA...63
CUTUBKA 10-AAD ..................................................................63
KORMEERADA DOWLADDA .............................................63
QODOBKA 65-AAD ..................................................................63
U YEERIDDA GOLAHA WASIIRADA ................................ 63
QODOBKA 66-AAD ................................................................. 64
CODKA KALSOONI KALA NOQOSHADA WASIIRADA ..... 64
QODOBKA 67-AAD ................................................................. 65
DIIDMADA CODKA KALSOONI KALA NOQOSHADA ... 65
QODOBKA 68-AAD ................................................................. 65
KORMEERKA GUDDIYADA GOLAHA WAKIILLADA ... 65
QODOBKA 69-AAD.................................................................. 66
HABRAACA DHAQAALAHA GOLAHA WAKIILLADA ...... 66

CUTUBKA 11AAD: ............................................................. 67
MAAMULKA GOLAHA WAKIILLADA ............................... 67
QODOBKA 70-AAD............................................................. 67
XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA WAKIILLADA ......... 67
QODOBKA 71-AAD............................................................. 69
SHURUUDAHA LAGU XULANAYO XOGHAYAHA GUUD ....69
QODOBKA 72-AAD............................................................. 69
SHAQAALAHA GOLAHA WAKIILLADA .......................... 69
QODOBKA 73-AAD............................................................. 70
ANSIXINTA XAALADDA DEGDEGGA AH ....................... 70
QODOBKA 74-AAD ............................................................ 70
HABRAACYADA GOLAHA WAKIILLADA ....................... 70
QODOBKA 75-AAD............................................................. 71
WAX-KA-BEDELKA XEER-HOOSAADKA ....................... 71
QODOBKA 76-AAD ............................................................ 71
DHAQAN-GALKA XEER-HOOSAADKA ........................... 71

## EREY BIXIN

Haddii aan xeerkani si kale u sheegin, macnaha ereyada soo socda waxaa loola jeedaa;

**Golaha Wakiillada:** Waxaa loola jeedaa Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**Dastuur:** Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland

**Dawlad:** Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliya.

**Xeer-hoosaad:** waxaa loola jeedaa Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**Guddoon/guddoonka:** Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL iyo labada Guddoomiye ku xigeen.

**Guddoomiye:** Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

**Guddi:** Waxaa loola jeedaa guddi hoosaadyada Golaha Wakiillada. **Guddi Joogto ah:** Waxaa loola jeedaa guddiga joogtada ah ee Golaha Wakiillada.

**Mooshin:** Waxaa loola jeedaa soo jeedinta ay xildhibaannadu Golaha u soo gudbiyaan.

**Guntan:** Waxaa loola jeedaa tirada xubnaha mudanayaasha uu sifo sharci ah ugu furmi karo fadhi Gole.

**Xubin/xubnaha:** Waxaa loola jeedaa xubnaha Golaha Wakiillada Puntland.

**Kalfadhi:** Waxaa loola jeedaa wadar kulameedka uu Goluhu yeesho sannadkiiba laba jeer.

**Fadhi:** Waxaa loola jeedaa kulan guud oo kasta oo Goluhu yeesho, kuna furma hab waafaqsan Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada.

**Xoghaye:** Waxaa loola jeedaa xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada.

**Ajande:** Waxaa loola jeedaa qorshe hawleedyada fadhiyada Golaha Wakiillada.

## CUTUBKA 1-AAD: XEER-HOOSAADKA GOLAHA WAKIILLADA

## QODOBKA 1-AAD: XEER-HOOSAADKA GOLAHA WAKIILLADA

1. Sida ku cad Qodobka 63.2 ee Dastuurka, Goluhu waa inuu meelmariyo xeer-hoosaadka lagu socodsiinayo Howlaha Golaha.
2. Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilladu waa xeer qaanuuni ah oo loo dejiyey qeexidda: -

   b. Qaab Dhismeedka Golaha Wakiillada.

   t. Awoodaha Golaha Wakiillada.

   J. Hab-dhaqanka Xubnaha iyo hanaan u socodsiinta howlaha Golaha.

   x. Habraaca Shaqo ee Guddiyada Golaha.

   kh. Habraaca Dhaqaalaha Golaha Wakiillada DPL

   d. Maamulka Golaha Wakiillada DPL

## QODOBKA 2-AAD: GOLAHA WAKIILLADA

1. Awoodda Xeer-Dejinta ee Puntland waxaa u xil saaran Golaha Wakiillada oo matala shacabka Puntland sida ku cad qodobka 60-aad Farqadiisa 1- aad ee Dastuurka DPL.

2. Goluhu wuxuu ka kooban yahay 66 xubnood

kuwaas oo laga soo doorto Gobollada Puntland si toos ah.

3. Mudane walba oo Golaha Wakiillada ka tirsan waxaa waajib ku ah inuu matalo muwaadiniinta Puntland oo dhan.
4. Muddada xilka ee Golaha Wakiilladu waa shan (5) sano, laga bilaabo taariikhda lagu dhawaaqo go'aanka doorashada, Xildhibaanka dib ayaa loo soo dooran karaa sida ku cad qodobka 60-aad Farqadiisa 3-aad ee Dastuurka DPL.
5. Xarunta Golaha Wakiiladu waa Magaalo madaxda DPL- ee Garoowe, sida ku cad qodobka 10-aad Farqadiisa 1-aad ee Dastuurka, wuxuuna xafiisyo ku yeelan karaa Gobollada Puntland oo dhan.
6. Golaha wakiilladu wuxuu Kal-fadhiyadiisa ku qabsan karaa meel kasta oo Puntland ka mid ah, haddii ay dhacdo sababo loogu shiri waayo Caasimadda.
7. Luqadaha Rasmiga ah ee Goluhu waa Soomaali iyo Carabi.

## QODOBKA 3-AAD:
## AWOODAHA GOLAHA WAKIILADA DPL

Golaha Wakiilladu wuxu leeyahay awoodaha iyo xilalka soo socda:

1. Dib u eegista, ansixinta, diidmada, wax-ka beddelidda iyo curinta xeerarka.
2. Ansixinta/diidmada xaalad dagaal iyo meel marinta heshiis nabadeed marka xukuumaddu soo jeediso.
3. In Goluhu cod kala bar lagu daray hal (1/2 +1) tirada xubnaha Golaha ku ansixiyo heshiis amaah qaadasho ee Puntland la gasho amaahiye ajnabi ah.
4. In Goluhu cod kala bar lagu daray hal (1/2 +1) tirada xubnaha ku ansixiyo heshiisyada caalamiga ah ama heshiis ay Dawlada Puntland dhinac ka tahay.
5. Ansixinta ama diidmadda degmo ama gobol cusub oo xukuumaddu soo jeediso.
6. Ka doodista, kormeeridda, dhaliilidda iyo talo ku biirinta siyaasadda iyo barnaamijyada xukuumadda.
7. Kormeeridda iyo qiimaynta dhaqangelinta sharciyadda ay Golaha Wakiilladu ansixiyaan
8. Goluhu waxay si shakhsi ah, sinnaan ku jirto ku dooranayaa Madaxweyaha iyo Madaxweyne ku-

xigeenka Dawladda Puntland. Marka 1-aad iyo 2-aad waa sadex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada, marka 3-aad waa hal dheeri.

9. Doorashada Difaacaha Xuquuqda Aadanaha, saddex (3) Xubnaha Guddiga Doorashada Puntland, iyo labada (2) garsoore ee Maxkamadda Dastuuriga ah, iyada oo la raacayo habraaca doorashada ee Golaha.
10. Oggolaanshaha ama diidmada Xubnaha fulinta ee xasaanad siinta u baahan.
11. In ay ansixiyaan ama diidaan barnaamijka xukuumadda.
12. Ansixinta, celinta, wax-ka bedelka Miisaaniyadda ay xukuumaddu soo gudbiso iyo is bedel kasta oo lagu sameeyo madax-yadeeda.
13. In ay ansixiyaan ama diidaan xisaab-xirka miisaaniyadda sanadkii hore.
14. In ay ogolaadaan ama diidaan canshuuraha ay xukuumaddu ka qaadayso dadweynaha ka hor inta aan lagu dhaqmin.
15. Oggolaanshaha/diidmada xaaladda degdeg ah ee xukuumaddu soo saarto muddo 30 cisho gudahood ah, haddii Goluhu diido wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, hase yeeshee hawlihii lagu fuliyey waxay noqonayaan ansax,

haddii aan Maxkamada dastuuriga ah u aqoonsan mid dastuurka ka soo horjeeda.

16. In ugu yaraan kala bar lagu daray hal (1/2 +1) tirada xubnaha Goluhu ku ansixiyaan xukuumadda.
17. Goluhu waxay u yeeri karaan mas'uuliyiinta sarsare ee dawladda, si wax looga weydiiyo hawlaha loo igmaday, haddii mas'uul loo yeeray cudur daar la’aan ka baaqsado in uu hortago Golaha ama guddi hoosaadyadiisa, Goluhu wuxuu ku wargelinayaa Madaxweynaha, waxaana loo qaadayaa cod kalsoonida ah.
18. Xasaanad ka qaadista mas’uul kasta oo Goluhu doorto ama meel mariyo xil u magacaabistiisa.
19. Ansixinta ama diidmada daabacaadda lacagta.
20. Ogolaanshaha hindisayaasha xukuumadda ee la xiriira curinta ama baabi'inta hay'adaha dawladda.
21. In uu u gudbiyo Golaha xukuumadda talooyin la xiriira ku dhaqanka miisaaniyadda ama bedelidda xeerarka Maaliyadda ka dib marka uu Goluhu dhegaysto warbixinta Hantidhawrka Guud.
22. Ansixinta iyo wax-ka-beddelka dastuurka dawladda Puntland iyo xeer- hoosaadka Golaha Wakiillada.

## QODOBKA 4-AAD:
## DHAARINTA XILKA

Xildhibaan kasta intuusan bilaabin shaqada xafiiska wuxuu marayaa dhaarta soo socota, waxaana dhaarinaysa Maxkamadda sare, wuxuuna u marayaa dhaartan:- **waxaan ku dhaaranayaa magaca ilaahay in aan ku dhaqmo diinta islaamka, dastuurka dalka Puntland iyo qawaaniintiisa dhawro, xilka la ii dhiibay daacadnimo u guto, dalka iyo dadkiisana lillaahi ugu adeego.**

Xildhibaanka diida in uu maro dhaarta kor ku xusan, wuxuu luminayaa xilka xildhibaanimada Golaha Wakiillada.

## CUTUBKA 2-AAD:
## Kalfadhiga Koowaad ee Golaha Wakiillada

## QODOBKA 5-AAD:
## Kalfadhiga Koowaad ee Golaha Wakiillada

1. Kalfadhiga koowaad ee Golaha Wakiilladu wuxuu qabsoomayaa muddo 30 cisho ah gudahood laga bilaabo taariikhda Guddiga Doorashada Puntland uu ku dhawaaqo natiijada doorashada Xidhibaannada Cusub.
2. Kalfadhiga koowaad ee Golaha Wakiillada ee la

doortay wuxuu qabsoomi karaa joogitaanka tiro dhan (Quorum) seddex-meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha.

3. Kalfadhiga koowaad Golaha Wakiilladu wuxuu Guddoomiye ku meel gaar ah u dooranayaa Xildhibaanka ugu da'da weyn Golaha, wuxuuna u kaashanayaa hawsha Doorashada Xoghayaha Guud ee Goloha Wakiillada.
4. Guddoomiyaha ku meelgaarka ah wuxuu magacaabayaa Guddiga Doorashada Guddoonka Golaha Wakiillada.
5. Guddiga Doorashadu waxay diyaarinayaan habraaca Doorashada Guddoonka.
6. Musharax kasta oo u tartamaya Xilka Guddoomiyaha waa in uu soo gudbiyo codsi qoraal ah iyo laba sawir, waxaana uu ku soo lifaaqayaa nuqul ka mid ah taariikh nololeedkiisa (CV).
7. Cod bixintu waa qarsoodi, marka 1-aad iyo 2-aad waa saddex meelood laba (2/3) tirada Guud ee Xubnaha Golaha, marka 3-aad waa cod hal dheeri ah.
8. Guddoomiyaha ku meel gaarka ahi wuxuu ku dhawaaqaa natiijada doorashada Guddoomiyaha Golaha Wakiillada.
9. Markii la doorto, Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu wuxuu la wareegayaa xilka Xafiiska Guddoonka, isagoo sii wadaya hab-raaca doorashada, xubnaha xafiiska Guddoonka tirada ka dhiman, isla markaana waa in uu ka tago xilka uu u hayo Xisbi siyaasadeed, waana in uu

shaqadiisa u guto si dhex-dhexaadnimo ah.

## QODOBKA 6-AAD:
## HABKA DOORASHADA LABADA GUDDOOMIYE KU-XIGEEN

1. Musharixiinta u tartamaya jagada Guddoomiye ku-xigeennada waa in ay yihiin xubno ka tirsan Golaha.
2. Musharax kasta waa inuu soo gudbiyo codsi qoraal ah iyo laba sawir, waxaana uu ku soo lifaaqayaa nuqul ka mid ah taariikh nololeedkiisa (CV).
3. Musharax walba waa in uu codsigiisa ku sheego jagada uu u tartamayo.
4. Codka waxaa la qaadayaa saddex wareeg, labada wareeg ee hore waa saddex meelood laba (2/3) tirada xubnaha Golaha, wareega saddexaadna waa hal dheeri.
5. Codka waxaa tirinaya Xoghayaha Guud iyo ciddii ka kaalinaysa.
6. Musharuxu wuxuu keensan karaa qof codka u hubiya.
7. Haddii ay dhacdo musharax keliya ee aan cidi la tartamayn in uu doorashada isu soo taago waxaa lagu ansixinayaa gacan taag.
8. Ku dhawaaqidda natiijada doorashada marba halka ay marayso waxaa leh Guddoomiyaha Golaha Wakiillada.

## CUTUBKA 3-AAD:
## GUDDOONKA GOLAHA WAKIILLADA
## QODOBKA 7-AAD:
## GUDDOONKA GOLAHA WAKIILLADA

Gudoonka Golaha Wakiilladu wuxuu ka kooban yahay:

- Gudoomiyaha Golaha Wakiillada
- Gudoomiye ku-xigeenka koowaad
- Gudoomiye ku-xigeenka labaad

## QODOBKA 8-AAD
## WAAJIBAADKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA

1. Gudoomiyuhu wuxuu guddoominayaa kalfadhiyada Golaha wuxuuna mas'uul ka yahay ilaalinta Dastuurka iyo dhawrista Xeer-hoosaadka, hagida/hubinta habsami u socodka hawlaha Goloha sida sharciga, maamulka iyo maamuuska.
2. Guddoomiyuhu wuxuu furayaa, xirayaana fadhiyada golaha, wuxuu sidoo kale, ku wargelinayaa dhammaan xubnaha Golaha qorshe hawleedka fadhiyada iyo ajendaha kalfadhiyada.
3. Guddoomiyuhu wuxuu matalaa Golaha, islamarkaana wuxuu ku hadlaa magacooda.
4. Guddoomiyuhu wuxuu saxiixayaa heshiisyada

Caalamiga ah ee u dhexeeya Golaha iyo Baarlamaannada kale ama ururada.

5. Guddoomiyuhu wuxuu diyaariyaa Ajendayaasha kalfadhiyada isagoo la tashanaya Guddoomiye ku xigeennada.
6. Guddoomiyuhu wuxuu hakin karaa fadhiyada muddo dhan 24 saac, haddii uu u arko maslaxad isagoo la tashanaya Guddoomiye ku- xigeennada.
7. Wuxuu qoraal u diri karaa Golayaasha Dowladda ee looga baahdo ka soo qayb galka fadhiyada Golaha Wakiillada ama shirarka Guddiga joogtada ah.
8. Wuxuu magacaabaa Xoghayaha Guud ee Golaha sida ku xusan Qodobka 63 (6) ee Dastuurka.
9. Wuxuu leeyahay soo gudbinta Miisaaniyadda Golaha, isagoo la tashanaya Guddoomiye ku xigeennada.
10. Wuxuu magacaabi karaa la taliyayaal, wuxuuna hawlaha Golaha u dalbi karaa Garyaqaano Soomaali ama ajnebi ah oo ka kaaliya sharciyada ama samaynta dastuurka haddii loo baahdo, isagoo la tashanaya guddoomiye ku-xigeennada.
11. Wuxuu magacabaa Guddiyo ka hawl gala dalka gudihiisa iyo dibadiisa marka uu la tashado Guddoomiye ku xigeennada.
12. Wuxuu madaxda Guddiyada (Guddiga Joogtada)

ah ee xilkooda gudan waaya u soo gudbiyaa Golaha markuu la tahashado Guddoomiye ku xigeennada.

13. Guddoomiyuhu xaq uma laha kala hormarinta ajandaha ka dib markii Goluhu ansixiyey, hadaan sidaa Goluhu la oggolaan.
14. Wuxuu u gudbiyaa mudanihii ka hor yimaada habsami u socodka hawlaha Golaha, Guddiga Anshaxa iyo Arrimaha Golaha.
15. Wuxuu Guddoomiyaa Shirarka ay yeeshaan Guddiga Joogtada ah.
16. Wuxuu kormeeraa Hawlaha Maamulka ee Golaha.
17. Haddii Guddoomiyuhu u arko mooshin ama hindise sharciyeed (Bill) in aanu waafaqsanayn shareecada Islaamka, Dastuurka ama Xeer-hoosaadka Golaha, waa ka joojin karaa arrimahaas oo kale in la hor dhigo Golaha si looga doodo ama go'aan looga gaaro.
18. Guddoomiyaha Goluhu waa siihayaha Xilka Madaxweynaha marka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenku ay dalka Puntland ka wada maqan yihiin, geeriyoodaan, is-wada casilaan ama xilka laga wada qaado.

## QODOBKA 9-AAD:

## XILKA GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA 1-AAD IYO 2-AAD

1. Guddoomiye ku-xigeennaddu waxay si joogto ah uga caawinayaan Gudoomiyaha Hawlaha Golaha.
2. Guddoomiyaha Goluhu markuu maqan yahay waxaa dhammaan hawshiisa fulinaya Guddoomiye ku xigeenka 1-aad, hadduu isna maqnaado waxaa xilka guddoominta la wareegaya Guddoomiye- ku-xigeenka 2-aad ee Golaha Wakiilada.
3. Haddii Guddoomiyuhu dhinto, is-casilo ama xilka laga qaado, Guddoomiye ku xigeenka 1-aad ayaa si ku-meel gaar ah u qabanaya xilka Guddoomiyaha inta laga dooranayo Guddoomiye Cusub.
4. Haddii xaaladaha kor ku xusani ku dhacdo Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenka 1aad waxaa xilka Guddoomiyaha si ku-meel gaar ah u haynaya Guddoomiye ku-xigeenka 2-aad inta laga dooranayo Guddoomiye iyo Guddoomiye ku-xigeen 1-aad oo cusub.
5. Haddii Guddoonkuba wada maqan yahay waxaa shaqada sii wadaya Guddoomiyaha Guddiga Shuruucda.

## QODOBAKA 10-AAD:
## XIL-WAAYIDDA GUDDOOMIYAHA & GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA

1. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeennadu waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:-

b. Geeri

t. Istiqaalo qoraal ah oo uu u soo gudbiyey Golaha.

J. Maqnaansho cudur daar la'aan ah oo gaaraysa 60-cisho oo isku xiga.

x. Ku xadgudub shareecada islaamka, dastuurka, xeer-hoosaadka iyo shuruucda kale ee dalka.

kh. Xil gudasho la'aan joogto ah sida: - dhimirkiisa oo wax u dhinmaan (waalli) ayna caddeeyaan Guddi dhakhaatiir ah oo la aqoonsan yahay laguna kalsoon yahay.

2. Mar walba oo ay mudada xil-hayntu ka dhammaato.
3. Xukun kama dambays ah oo ay ku riday maxkamad awood u leh uuna ku mutaysanayo ciqaab.
4. Haddii ay dhacaan arrimaha qodobkan faqradihiisa sare ku xusan midkood ama dhammaantood waxay ku waayayaan xilkooda saddex meelood laba meelood (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada.
5. Soojeedinta (motion) xil-ka-qaadista

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada iyo labada Guddoomiye ku-xigeen, waxaa soo jeedin kara saddex meelood meel (1/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada, markii laga doodo ka dib, wuxuu ku ansaxayaa marka ay oggolaadaan saddex meelood laba meelood (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada.

## QODOBKA 11-AAD:
## GUDDIGA JOOGTADA AH

Guddiga joogtada ah wuxuu ka kooban yahay Guddoomiyaha, Labada Guddoomiye ku-xigeen iyo Toban Madax Guddiyeed oo kala ah:

1. Guddoomiyaha Guddiga Shuruucda, Caddaaladda, Arrimaha Diinta iyo Dastuurka.
2. Guddoomiyaha Guddiga Siyaasada, Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo xiriirka caalamiga ah.
3. Guddoomiyaha Guddiga Anshaxa iyo Arrimaha Golaha.
4. Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyadda.
5. Guddoomiyaha Guddiga Amniga iyo Nabadgelyada.
6. Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda, Dhaqaalaha iyo Xisaabaadka.
7. Guddoomiyaha Guddiga Hawlaha Guud, Gaadiidka, Ganacsiga iyo Kaabayaasha

Dhaqaalaha.

8. Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Bulshada, Dhaqanka, Warfaafinta iyo Isgaarsiinta.
9. Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah.
10. Guddoomiyaha Guddiga Xuquuqda Insaanka, Haweenka iyo Arrimaha Qoyska.

## QODOBKA 12-AAD:
## DOORASHADA XUBNAHA GUDDIGA JOOGTADA AH

Doorashada Xubnaha Guddiga Joogtada ah waxay ku imaan kartaa:-

1. Wadatashi ka dib, Xubnaha Gobol kasta oo Puntland ka tirsan wuxuu soo magacaabi doonaa xubnaha uga mid noqonaya Guddiga Joogtada ah.
2. Haddii Xubnaha Gobolku aanay go'aan midaysan ka gaarin iskuna raacin xulidda xubnaha uga mid noqonaya Guddiga Joogtada ah, Golaha ayaa kala dooranaya musharixiinta u taagan jagadaas ama jagooyinkaas ee Xubnaha Gobolka.
3. Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu isagoo la tashanaya Guddoomiye ku- xigeennada, wuxuu magacaabaa, iskuna bedeli karaa xilalka madax-guddiyeedyada iyo xubnaha guddiyada.

## QODOBKA 13-AAD:
## XILKA GUDDIGA JOOGTADA AH

1. Socodsiinta hawlaha Golaha muddada u dhaxaysa labada kalfadhi (Fasaxa).
2. La socoshada dhacdooyinka iyo ururinta xogaha inta lagu jiro fasaxa, si loogu soo bandhigo Golaha.
3. Hubinta fulinta barnaamijyada xukuumadda sidii loogu talo galay in uu u fulay.
4. Waxay u yeeri karaan mas'uul kasta si ay su'aalo uga weydiiyaan shaqada loo idmaday
5. Waxay ansixiyaan barnaamijta iyo qorshayaasha shaqo ee Golaha.
6. Waxay ka talo bixiyaan arrimaha Siyaasadda, Amniga, Difaaca, Dhaqaalaha, Arrimaha Bulshada iyo Dhaqanka.
7. Waxay Xoojiyaan xiriirka saaxiibtinimo ee ka dhexeeya Golaha Wakiillada iyo Baarlamaannada kale.
8. Waxay Kormeeraan shaqada wasaaradaha, hay’adaha dawladda iyo kuwo aan dawliga ahayn.
9. Waxay soo saaraan baaqyo Baarlamaani ah mar kasta oo ay jiraan dhibaatooyin dabiici ah iyo kuwo bani’aadannimo.

## QODOBKA 14-AAD:
## SHIRARKA GUDDIGA JOOGTADA AH

1. Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ayaa ah Guddoomiyaha Guddiga Joogtada ah.
2. Guddiga Joogtada ah wuxu todobaadkiiba yeelanayaan hal shir inta lagu guda jiro fasaxa Golaha.
3. Kulanka Guddiga Joogtada ah wuxuu furmayaa marka ay joogaan saddex-meelood laba meelood (2/3) xubnaha Guddiga.
4. Dhammaan go'aamada guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah, haddiise natiijadu is le'ekaato laba wareeg ee codbixin ah ka dib, waxaa cod hal dheeri ah yeelanaya Guddoomiyaha.
5. Haddii Guddoomiye Guddi uu shaqada cudur-daar kaga maqan yahay, waxaa shaqada Guddigaas sii wadaya Guddoomiye ku xigeenka Guddigaas.
6. Xoghayaha Guud ee Golaha, fadhiga Guddiga waa ka soo qayb gelayaa, ra'yigiisana waa ka dhiiban karaa, hase yeeshee ma yeelan karo awood codeyn.

## QODOBKA 15-AAD

## SHURUUDAHA LAGU LUMIN KARO XUBINNIMADA GUDDIGA JOOGTADA AH

1. Geeri
2. Xil Gudasho la'aan.

3. Haddii fasax la'aan xubin ay ka maqnaanto fadhiyada Guddiga joogtada ah labo kulan oo is-xiga sabab la'aan.
4. Jebinta Shareecada islaamka, Dastuurka, Xeer-hoosaadka iyo xeerarka kale ee dalka.
5. Istiqaalo qoraal ah keento, lagana aqbalo.

## CUTUBKA 4-AAD:
## XUBNAHA GOLAHA WAKIILLADA

### QODOBKA 16-AAD:
### WAAJIBAADKA WAKIILNIMO EE XUBNAHA GOLAHA

1. Mudane kasta wuxuu wakiil ka yahay shacabka Puntland, isla markaasna wuxuu waajibaadkiisa shaqo u gudanayaa si waafaqsan danaha ummadda Puntland.

2. Xilliga kalfadhiyada Goluhu xiran yihiin Xubnaha Goluhu waxay gudanayaan waajibaadyada hoos ku qoran:-

b. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha waa in ay kormeer shaqo ku tagto deegaamada laga soo doortay, waxayna u kuurgalaysaa arrimaha Siyaasadda, dhaqaalaha, amniga iyo arrimaha bulshada.

t. In ay qabtaan kulammo guud oo ay bulshada kula socodsiinayaan arrimaha horyaal Golaha, ayna kala hadlaan horumarinta deegaanka,

nabadda iyo dhammaystirka khilaafyada beelaha dhexdooda ah.

j. In ay kala tashadaan arrimaha guud ee ay danaynayaan iyo baahida deegaanka.

x. In ay Golaha u soo gudbiyaan warbixin qoraal ah wixii ay kala kulmeen booqashadooda hawleed.

**QODOBKA 17-AAD:**
**XUQUUQDA XUBNAHA GOLAHA**

1. Xuquuqda gunno ee xubnaha waxay bilaamaysaa markii loo dhaariyo xilka, waxayna u kala baxdaa sidan:-

   b. Gunno Bille ah.
   t.. Gunno Fadhi.
   j. Gunno Deegaan.
   x. Gunno Caafimaad.
   Kh. Gunno Gaadiid.
   d. Gunno Sahay Safar Shaqo.

2. Faah-faahinta qadarka gunnooyinkaas waxaa habaynaya xeer gaar ah oo Goluhu soo saari doono.
3. Mudanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo hal koobi xeerka kasta oo Goluhu ansixiyo.
4. Xilliga xubnaha haweenku ku jiraan fasax-ummuleedka waxay xaq u leeyhiin in ay helaan waraaqaha la xiriira hawlaha Golaha iyo

go'aamada ka soo baxa kalfadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn.

5. Dhammaan arrimaha khuseeya fasax-ummuleedka iyo muddada, waxaa go'aan ka gaaraya Guddoonka Golaha Wakiillada.
6. Xildhibaan kasta oo dib loo soo dooran waayo wuxuu xaq u leeyahay 12 bilood mushaharkood oo sagootis ah.
7. Wixii xuquuq ah ee ka maqnaada xildhibaannada muddada ay xilka hayeen, waxaa waajib ku ah xukuumad kasta oo timaada inay bixiso xuquuqda u jidowdey oo buuxda.
8. Xildhibaan kasta wuxuu xaq ugu leeyahay dawladda inuu helo ciidan suga amnigiisa.
9. Guddoonka Golaha Wakiilladu marka ay xilka banneeyaan waxay xaq u yeelanayaan mushaharkooda bil walba iyo iyadoo la sugo amnigooda si waafaqsan xeerka hab-maamuuska.

## QODOBKA 18-AAD:
## LUMINTA XUBINNIMADA GOLAHA

Sida ku cad Qodobka 62-aad ee Dastuurka Puntland, Xubinnimada Golaha wakiillada waxaa lagu lumin karaa:-

1. Xubinta oo geeriyoota.
2. Xubinta oo ay la soo gudboonaato xaalad xil

gudasho la'aaneed oo joogto ah.

3. Xubinta oo istiqaalad u gudbisa Golaha, lagana oggolaado.
4. Xubinta oo ka maqnaata labo Kalfadhi oo is xiga sabab la'aan.
5. Xubinta lumisa xubinnimadda Golaha Wakiillada, waxaa bedelaya qofka sida sharciga ah booska u mutaysta, iyadoo la raacayo habraacii doorashadii hore.
6. Sharciga Doorashada ayaa tilmaamaya habraaca loo marayo xulashada xubinta bedelaysa, waa in lagu dhaariyo soddon (30) bari gudahood.

## QODOBKA 19-AAD: XASAANADDA XUBNAHA

1. Xubnaha Goluhu waxay leeyihiin xasaanad, si waafaqsan Qododbka **131- aad (3)** ee Dastuurka Puntland.
2. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Wakiillada lama xiri karo, lama baari karo jirkiisa, deegaankiisa, xafiiskiisa iyo gaadiidka uu markaa wato, lagumana oogi karo dacwado dambiyo culus laga bilaabo maalinta la doorto ilaa uu ka dhamaysto muddada la doortay ama uu iscasilo, haddii aan Golaha Wakiilladu ka xayuubin xasaanada.

3. Dambiyada iyo khaladaadka aan cuslayn oo ay galaan xubnaha Golaha Wakiilladu laguma xiri karo, loogumana yeeri karo in ay maxkamada horteeda qiraal ka baxshaan, marka laga reebo dacwadaha madaniga ah.
4. Markii xildhibaan laga qaadayo xasaanadda waa in ay oggolaadaan xasaanad ka qaadistiisa saddex meelood laba meelood (2/3) tirada guud ee Xubnaha Golaha Wakiillada.

**QODOBKA 20-AAD:**

**IMAANSHAHA KALFADHIYADA GOLAHA**

1. Waxaa xubin walba oo ka mid ah Golaha Wakiillada waajib ku ah inay ka soo qayb gasho Kalfadhiyada.
2. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Wakiillada oo ka maqnaata fadhiyada muddo saddex maalin shaqo ah, iyada oo aan ogolaansho haysan, waxaa la gudoonsiin doonaa digniin.
3. Haddii maqnaanshuhu gaaro bil gudaheed muddo todobo maalin-shaqo ah oo isku xiga ama kala duwan iyadoo aan haysan ogolaansho, waxaa lagu ganaaxayaa lacag dhan shan meelood meel (1/5) gunnada kalfadhiyada laga siiyo.
4. Maqnaanshaha intaa ka badan waxaa loo gudbinayaa Guddoomiyaha Golaha oo u sii

gudbinaya Guddiga Anshaxa iyo Arrimaha Golaha si ay go'aan uga gaaraan.

5. Mudanihii fadhiga oo aan dhammaan ka baxa, waxaa loo qorayaa maqnaansho.

## QODOBKA 21-AAD:
## LEBISKA IYO HAYBADDA XILDHIBAANKA

Waxaa ka reebban Xildhibaanka Golaha Wakiillada in uu Golaha ku yimaado muuqaal aan ku habboonayn haybadiisa oo aan waafaqsanayn shareecada islaamka.

## QODOBKA 22-AAD:
## HANNAANKA HAWL SOCODSIINTA GOLAHA

1. Xubnaha Golaha wakiiladdu waxay shaqada soo galayaan 8:00 subaxnimo, xilliga ka bixiduna waa furan yahay.
2. Xubnaha Goluhu waa in ay saxiixaan diiwaanka shaqada ka hor bilowga fadhiga iyo kadib markii goluhu ka soo noqodo biririfta.
3. Saxiixa Diiwaanka shaqada waxaa la xirayaa 9:00 subaxnimo, waqtiga nasashadu waa 10:00 -10:15 daqiiqo subaxnimo.
4. Waxaa magacyada xildhibaanada jooga iyo kuwa maqan la diiwaan gelinayaa fadhi walba.
5. Maalin kasta ka hor inta aan la guda gelin hawl maal-meedka waxaa Golaha lagu furi doonaa Aayadaha Quráanka Kariimka ah.

6. Xubin Kasta oo aan saxiixin diiwaanka imaanshaha laba jeer waxay luminaysaa Gunno Maalmeedkeeda.
7. Guddoomiyaha Guddiga Shuruucda iyo Xoghayaha guud ee Golaha Wakiillada waxay haynayaan saxiixa rasmiga ah ee dhammaan xubnaha Golaha Wakiillada.
8. Waxaa xildhibaannada siin kara Fasaxa Guddoomiyaha Golaha Wakiillada.
9. Waxaa ka reebban Xildhibaanka:

   b) In uu sameeyo dhaqdhaqaaq aan loo baahnayn ama uu ka baxo fadhiga iyadoo doodu socoto.

   t) In telefoonka gacantu furnaado inta fadhiga lagu guda jiro.

   j) In mudane loo oggolaaday hadal ama dood mudane kale dhex galiyo hadal ama buuq.

10. Xubin kasta oo ku kacda arrimaha kor ku xusan waxaa magaceeda loo gudbinyaa Guddiga Anshaxa iyo arrimaha Golaha.
11. Xubin kasta oo ay la soo gudboonaato xaalad gaar ah, waxay fasax ka qaadanaysaa Guddoomiyaha Golaha.

## QODOBKA 23-AAD:
## HAB DHAQANKA XUBNAHA GOLAHA WAKIILLADA HORUMARINTA IYO KOR U QAADISTA QIYAMKA GOLAHA WAKIILLADA

Xubin kasta:

1. Waa in ay si daacad ah ugu adeegto, tusaale wanaagsanna u noqoto dadka reer Puntland.
2. Waa in ay ilaaliso xaqiijisana ku dhaqanka Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Qawaaniinta kale ee dalka u yaala.
3. Hawl gudashadeeda waa inay ku salaysan tahay ilaalinta iyo ixtiraamka danaha dadweynaha iyo midda qaran.
4. Waa in ay ku shaqeyso xilkasnimo, hufnaan iyo isla xisaabtan.

## QODOBKA 24-AAD:
## ADEEGSIGA AWOODDA

1. Waxaa reebban in xubintu u adeegsato mas'uuliyadeeda wuxuusan sharcigu u jidayn.
2. Waxaa reebban in xubintu u isticmaasho awoodeeda iyo waajibaadkeeda dano gaar ah.

## QODOBKA 25-AAD:

## XIL-GUDASHO

Waajibaadka dastuuriga ah ka sakow, xubin kasta oo hawl loo asteeyo ama loo igmado waa in ay u fulisaa si rabitaan ku jiro, iyadoo adeegsanaysa aqoonteeda iyo waayo-aragnimadeeda.

## QODOBKA 26-AAD:

## ILAALINTA HEYBADDA IYO SHARAFTA GOLAHA

Xubin kasta:

1. Waa in ay goob kasta oo ay joogto ilaalisaa sharafta iyo heybadda Golaha.
2. Waa inuu ka dhawrsanaadaa falalka aan wanaagsanayn.
3. Waa inuusan caayin, ku gabood falin ama bahdilin qof dhex jooga xarunta Golaha ama uusan carqaladaynin hawlaha Golaha.

## QODOBKA 27-AAD

## ILAALINTA XOGAHA SIRTA AH

Iyadoo la raacayo mabda'a isla-xisaabtanka marka la gudanayo waajibaadka, xubin kasta waa inay sirta Golaha u ilaalisaa si waafaqsan arrimahan soo socda:

1. Xubin kasta waa in ay sirta xafidaa arrimaha

kala soo gudboonaada hawlahooda, sababtoo ah waxay wax u dhimmi karaan dawladda ama danaha dadweynaha xag nabadgelyo ama amni.

2. Xubinina waa inaysan dibeda u soo bandhigin arrimaha lagaga hadlay kulamada albaabadu u xiran yihiin ka hor inta aan dadweynaha loogu gudbin hab-raaca sharciga ah
3. Xubin kasta oo Guddiga ka tirsan waa in ay xafidaa sirta Guddiga inta aysan warbixintooda u soo gudbin Golaha.

## QODOBKA 28-AAD
## KA FOGAANSHAHA ABUURIDDA COLAAD DADWEYNE

1. Xubin kasta waa in ay ka fogaato ku dhaqaaqidda falal sababi kara colaad dadweyne, kacdoon, mu'aamarad, rabshado kuwaasoo dhamaantood ah faldambiyeedyo.
2. Waa inaysan xubintu ku talaabsan taageeridda garab iyadoo garab kale dhaleecaynayso ama aysan talo ku soo jeedin arrin colaad ka dhex abuuri karta dadweynaha.

## QODOBKA 29-AAD
## ANSHAX-MARINTA MUDANAYAASHA

1. Mudane kasta wuxuu waajibkiisa u gudanayaa si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka, Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, amarada sharciga ah ee la faray xubin kasta marka Goluhu doodayo ama go'aano gaarayo.
2. Mudanaha ku kaca xad-gudub, iyadoo la eegayo xad-gudubkaas inta uu la'eg yahay waxaa la marinayaa talaabooyinka anshax marineed ee ku habboon.
3. Haddii Xubini u hogaansamiweydo hagidda Guddoomiyaha Golaha, haddana ku sii socoto falkii hore looga digay: -
   - b. Hadalka waa laga joojin karaa mudanihii ka weecda arrinta doodu ka furnayd welina ku sii adkaysta, isagoo la xusuusinayo inuu mawduucii ku laabto iyo
   - t. Isagoo mudanaha la magacaabo.

## QODOBKA 30-AAD:
## KA JOOJINTA FADHIYADDA

1. Guddoomiyaha ayaa mudanaha magacaabi kara, madasha hadalkana ka joojin kara ama fadhiga Golaha ka saari kara, marka uu ku kaco xarfaha B iyo T ee ku xusan qodobka 29-aad.

2. Guddoomiyaha wuxuu mudanaha ka joojin karaa fadhiyada Golaha laba cisho.
3. Haddii mudanuhu uu diido in uu u hogaansamo joojinta, wuxuu Guddoomiyuhu u qoraya mudanaha warqad digniin ah.
4. Wuxuu kaloo guddoomiyuhu ku wargelinayaa arrintani Guddiga Anshaxa iyo Arrimaha Golaha si ay u meel mariyaan waxa uu sharcigu ka qabo.
5. Guddiga Anshaxa iyo Arrimaha Golaha waxay ka baaran degeyaan, iyagoo tixgelinaya sharciga hadduu mudanuhu luminayo xubinimadiisa sida uu qabo Xeer-hoosaadku.
6. Waa mas'uuliyada Guddoomiyaha ka dib markii la dhageysto aragtida iyo ra'yigiisa, isagoo tixgeliyey qoraalka ay soo gudbiyeen guddiga anshaxa iyo Arrimaha Golaha inuu mudanihii eedeysnaa ama hore looga joojiyey inuu mar labaad ku soo noqdo madasha.

## QODOBKA 31-AAD:
## DIGNIIN AFEED

Guddoomiyuhu wuxuu digniin afeed siin karaa: -

1. Mudane kasta oo caadaysta inuu ka hadlo mawduuc aan dooda ku jirin, ama u dhaqma si aan habboonayn ama muran joogta ah sameeya.
2. Mudanihi carqaladeeya habsami u socodka

hawlaha Golaha iyo guddiyadiisa.

3. Mudanihii dhawriwaaya saacadaha shaqada ee golaha iyo guddiyadiisa.
4. Sheekaysi iyo dhaqdhaqaaq sabab la'aaneed la yimaada ama abuura si ku talo gal ah muran aan loo baahnayn.
5. Isku daya ama ku dhaqaaqa falal aan waafaqsanayn nidaamka taasoo wax u dhimaysa haybadda Golaha.

## QODOBKA 32-AAD:

## DIGNIIN QORAALEED

Guddoomiyuhu wuxuu digniin qoraaleed siin karaa: -

1. Mudanihii digniin afeed horay u qabay, haddana weli ku sii socda isla falkii horay looga digay.
2. U hogaansami-waaya hagidda Guddoomiyaha Golaha.
3. Badheedh ula soo gala hub iyo walxo kale oo amni darro keeni kara.
4. Af-lagaado badheedh ah u geysta Guddoomiyaha ama shir gudoonka ama mudanayaasha Golaha.

## QODOBKA 33-AAD:
## KA JOOJINTA DOODDA

Waxaa hadalka laga joojin karaa mudanihii ka weecda arrinta doodu ka furan tahay, isagoo la

xusuusiyey inuu mawduuca ku laabto.

## QODOBKA 34-AAD:
## KA SAARISTA MADASHA

Madasha shirka waxaa laga saari karaa mudanihii ku hadla ereyo gef ah ama ku kaca fal uu ku carqaldaynayo habsami u socodka dooda kuna kaca falal kuwii hore ka daran, waxa shirka laga saaraya fadhiga maalintaas.

## QODOBKA 35-AAD:
## KA JOOJINTA FADHIYADA

Mudanaha waxaa laga joojin kara fadhiyada Golaha ama guddiyada (3 ilaa 15 cisho) ka dib markii hore digniin afeed iyo mid qoraal ah loo siiyey, doodii laga joojiyey fadhiyadiina hore looga saaray, laakiin ka baaqsada inuu ganaax bixiyo ama u hogaansamo go'aankii guddiga anshaxa iyo Arrimaha Golaha, waxaa mudanaha laga joojinayaa in uu ka qayb galo shirarka kalfadhiyada iyo hawlaha kale ee Goluhu ku talaabsanayo sida mooshinnada, muddada kalfadhiyada laga saaray mudanuhu ma helayo wax gunno maalmeed ah.

## QODOBKA 36-AAD:
## KA DOODIDDA IYO GO'AAN KA GAARISTA XUBINNIMADA MUDANAHA

Mudanihii ku guuldaraysta u hogaansaanta talaabada anshax marineed ee goluhu ka gaaray oo misna iska sii wata in uu carqaladeeyo golaha, goluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu ka doodo talaabo ku habboona ka qaato mudanahaas xubinnimadiisa

## CUTUBKA 5-AAD:
## MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU- XIGEENKA DPL

## QODOBKA 37-AAD:
## DOORASHADA MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU-XIGEENKA

1. Goluhu waxay dooranayaan Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka Puntland Sideed (8) Maalmood Gudahood kadib Fadhiga ugu horeeya ee Golaha Wakiillada ee la doortay.

2. Guddoomiyaha Golaha ayaa magacaabaya Guddiga Doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka, waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada.
3. Guddiga Doorashada Madaxweynaha iyo

Madaxweyne ku xigeenka ayaa diyaarinaya Habraaca Doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka.

4. Guddiga doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka ayaa soo bandhigaya liiska Musharixiinta u tartamaya xilka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka.
5. Natiijada doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka waxaa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

## QODOBKA 38-AAD:
## XIL-KA-QAADISTA MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU-XIGEENKA

1. Haddii Madaxweynaha ama Madaxweyne ku xigeenka lagu eedeeyo ku xad gudub dastuurka, khiyaamo qaran iyo xil gudasho la'aan waxaa loo marayaa habraaca ku xusan Qodobka 82-aad ee Dastuurka.
2. Mooshinka xil ka qaadista waxaa soo jeedin kara ugu yaraan waax (1/4) tirada xubnaha Golaha Wakiillada ama Xeer-ilaaliyaha Guud.
3. Ka doodista eedaynta Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka waa in ay oggolaadaan ugu yaraan kala bar lagu daray hal ($1/2$ +1) tirada xubnaha Golaha.

4. Goluhu wuxuu ka baaraan degayaa eedaymaha la soo hordhigay, waxana eedaysanaha la siinayaa fursad is-difaac.
5. Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeen waxaa xil ka qaadis lagu samayn karaa markii si qarsoodi ah Golaha Wakiilladu ugu codeeyaan saddex meelood laba (2/3) tirada xubnaha Golaha Wakiillada.

## QODOBKA 39-AAD:
## DHAARTA MADAXWEYNAHA IYO MAXADWEYNE KU-XIGEENKA DPL

Inta aysan xilka la wareegin Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka DPL waxay ku hor dhaaranayaan Golaha Wakiillada, waxaana dhaarinaya Maxkamada Sare waxayna ku dhaaranayaan dhaarta soo socota:

***"Waxaan ku dhaaranayaa magaca ilaahay inaan ku dhaqmo diinta islaamka, dastuurka dalka Puntland iyo qawaaniintiisa dhawro, xilka la ii dhiibay daacadnimo u guto, dalka iyo dadkiisana lillaahi ugu adeego"***

## QODOBKA 40-AAD:
## BANNAANAANTA XILKA MADAXWEYNAHA

1. Haddii Madaxweynuhu geeriyoodo, iscasilo, xilka laga xayuubiyo ama xil Gudasho la'aan joogto ah la soo gudboonaato, waxaa Xilka Madaxweynaha loo dhaarinayaa Madaxweyne ku-xigeenka inta ka hartay muddada xilhayntiisa.
2. Haddii Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenkuba geeriyoodaan, is casilaan ama isku mar xilka laga xayuubiyo, waxaa xilka Madaxweynaha sii haynaya Guddoomiyaha Golaha Wakiillada inta Madaxweyne iyo Madaxweyne ku-xigeen cusub lagu dooranayo muddo 30 bari gudahood.

**QODOBKA 41-AAD:**

**IMAANSHAHA MADAXWEYNAHA EE KALFADHIYADA GOLAHA**

1. Madaxweynuhu wuxuu iman karaa Golaha Xilliyadan:-

   b. Furitaanka Kalfadhiyada Golaha sida ku xusan Qodobka 80-aad ee farqadda 12-aad ee Dastuurka Puntland.

   t. Wuxuu kaloo hor iman karaa xilli kasta oo Goluhu u yeero.

   j. Markii Madaxweynuhu codsado imaanshaha Golaha.

2. Madaxweynuhu kama soo qeyb geli karo kalfadhiyada caadiga ah ee Golaha markii mooshin

cod qaadis ahi socdo.

## CUTUBKA 6-AAD KALFADHIYADA GOLAHA WAKIILLADA

### QODOBKA 42-AAD
### KALFADHIYADA GOLAHA

1. Goluhu wuxuu yeelanayaa laba kalfadhi oo caadi ah oo ku kala aaddan 25- ka Oktoobar iyo 15-ka Juun Sannad Walba. Kalfadhiyada aan caadiga ahayn waa la qaban karaa haddii baahidu keento.
2. Muddada Kalfadhigu soconayo waa 45 maalmood, waana la kordhin karaa .
3. Xubnaha Golaha waxaa loo gudbinayaa Ajendaha qabyada ah bil ka hor furitaanka kalfadhiga caadiga ah.
4. Ajandaha qabyo qoraalka ah waxaa ka doodaya Xubnaha Golaha, waxayna ansixinayaan ajanadaha rasmiga ah.
5. Kalfadhiga Goluhu wuxuu soconayaa inta ajendaha la horkeenay ka dhammaanayo.
6. Kalfadhiyada Golaha ee caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahaynba waxay ku ansaxayaan joogitaanka Sadex meelood labo meel (2/3) tirada Xubnaha Golaha Wakiillada.
7. Furitaanka kalfadhiga waxaa Golaha la siin doonaa

warbixin ku saabsan wax-qabadkii Guddiga Joogtada ah muddadii Goluhu fasaxa ku jiray.

8. Goluhu waxay dhegaysanayaan warbixinta iyo macluumaadka ay soo ururiyaan Guddiyadu muddo 3-cisho, iyadoo ay mid mid u soo jeedinayaan Madax gudiyeedyadu ama cidii ay u wakiishaan.
9. Golaha waxaa loo soo gudbinayaa hindise sharciyeedyo ka yimaada Golayaasha dawladda.

## QODOBKA 43-AAD:
## KALFADHIYADA AAN CAADIGA AHAYN EE GOLAHA WAKIILLADA

Kalfadhiyada aan caadiga ahayn, waxaa isugu yeeri kara Guddomiyaha Golaha, Madaxweynaha ama waax (1/4) xubnaha Golaha Wakiillada, ka dib marka la helo codsi sababaysan sida ku cad qodobka **65.2** ee Dastuurka Puntland, Xildhibaannada soo jeedinaya kalfadhi aan caadi ahayn waxaa laga rabaa:-

b. In ay goobjoog yihiin.
t. In aanu qof kale u wakiilan saxiixa
J. Xildhibaanku waa ka noqon karaa soo jeedinta Mooshinka, isagoo ku caddeynaya qoraal iyo saxiix.

## QODOBKA 44-AAD:
## AJANDAHA KALFADHIYADA AAN

**CAADIGA AHAYN**

Ajandaha kalfadhiga aan caadiga ahayn waxaa diyaarinaya Guddoonka oo kaashanaya Xoghayaha Guud ee Golaha Afartan iyo Sideed (48) saacadood ka hor inta aan Kalfadhigu furmin waa in ajanduhu gaaraa dhammaan Xubnaha Golaha.

## QODOBKA 45-AAD:
## HABSAMI U SOCODKA HAWLAHA GOLAHA

1. Goluhu markuu qabsanayo hawshiisa wuxuu raacayaa nidaamka hoos ku qoran:

   b. Guddoomiyaha ayaa shirka furaya ka dib markii Xoghayaha Guud u gudbiyo tirada joogta, tirada fasaxa ah iyo tirada maqan
   t. Akhrinta aayadaha Quraanka Kariimka ah
   j. Ansixinta Ajandaha
   x. Dhaarinta xubnaha cusub haddii ay jiraan
   kh. Waqtiga Su'aalo weydiinta
   r. Su'aal wadareed (Dood)
   S. Soo jeedinta Guddoomiyaha
   sh. Hindise Sharciyeedka maraya akhrinta 1-aad
   dh. Hindise Sharciyeedka maraya akhrinta 2-aad
   c. Warbixinta Guddiga.
   g. Hindise Sharciyeedka maraya akhrinta 3-aad.
   f. Cod u qaadista hindise sharciyeedka
   q. Mooshinnada.

## QODOBKA 46-AAD:

## TIRADA (QUORUM)

1. Furitaanka kalfadhiga Goluhu wuxuu ku furmayaan tiro (Qouram) dhan saddex meelood laba (2/3) tirada xubnaha Golaha Wakiillada.
2. Fadhiyadu Goluhu waxay ku furmayaan kala bar lagu daray hal (1/2 +1) tirada xubnaha Golaha Wakiillada.
3. Mar kasta oo cod la qaadayo waa in la hubiyo tirada xubnaha fadhida.
4. Haddii qayb ka mid ah mooshinka ama ajandaha codeyntoodu u baahan tahay saddex meelood oo laba (2/3) tirada xubnaha waa in ay joogaan ugu yaraan saddex meelood laba (2/3) tirada xubnaha Golaha.

## QODOBKA 47-AAD: COD-BIXINTA

1. Cod-bixintu waxay u kala baxdaa sida soo socota:-

    b. Cod-bixin qarsoodi ah.
    t. Cod-bixin gacan taag ah.

2. Cod-bixinta qarsoodiga ah waxay u dhacaysaa habkan: -

    b. Guddoomiyuhu wuxuu amrayaa xaadirinta mudanayaasha & in loo qaybiyo mudanayaasha warqadaha cod-bixinta, haddii tiradii kooramka loo baahan yahay ay joogaan.
    t. Cod-bixinta qarsoodiga ah Guddoomiyaha Golaha ayaa xaqiijinaya tirada mudanayaasha codka bixiyay, codka khasaaray ama aan la bixin,

wuxuna ku dhawaaqaya natiijada cod-bixinta.

3. Haddii codadku labo jeer is le'ekaadaan Guddoomiyaha ayaa yeelanaya cod hal dheeri ah mar saddexaadka, wixii aan ka ahayn doorasho xil.
4. Cod-bixinta la xiriirta wax ka bedelka ama kaabidda Dastuurka DPL waa gacan taag.
5. Marka la codaynayo mudanaha aan dhinacna u codayn (Ogol/Diidan/Aamus) isaga oo fadhiya shirka waxa loo aqoonsanayaa Mudane aamusay.
6. Haddii la arko qaladaad habka cod-bixinta qarsoodiga ah ama gacan- taagga ama ay muuqato cod-bixin ka badan mudanayaasha jooga fadhiga ama in ka yar, natiijada cod-bixinta waxaa loo aqoonsanayaa waxba kama jiraan Guddoomiyaha Golaha ayaa ku dhawaaqaya in si degdeg ah loogu noqdo cod bixin cusub ilaa inta ay sugmayso codbixintaasi, natiijada codbixin kasta waxa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha Golaha isaga oo caddaynaya tirada ogolaatay, tirada diiday, tirada ka aamustay & tirada xumaatay.

## QODOBKA 48-AAD:
## HABKA DOODAHA GOLAHA

1. Xubin kasta xaq ayey u leedahay in ay muujiso aragtideeda si xor ah inta dooddu socoto.
2. Sida ku cad farqadda 1aad ee qodobkan, Xubnaha

Goluhu waxay ka qayb qaadan doonaan doodaha sida waafaqsan qodobadan soo socda:

b. Xubin kasta waa in ay u cabirtaa aragtideeda si kooban, qeexan, waafaqsan mawduuca, oo aan celis lahayn, lana ixtiraamo waqtiga loo qoondeeyey xubinta oo dhan 3-daqiiqo.

t. Ka fogaanshaha hadal keeni kara xiisad, kicin, khalkhalna gelin kara wadanka iyo shacabka.

J. Xubinta cabiraysa fekerkeeda laguma samayn karo dhex gal, gunuunuc, qaylo, sacbin, foori iyo wixii kale ee dhaqan xumo ah.

x. Mudane aan ogolaansho ka haysan Guddomiyaha, ma soo gudbin karo arrin ka baxsan ajendaha Kalfadhiga.

kh. Xubina kama bixi karto fadhiga ka dib marka ay jeediso fekerkeeda hadii aan fasax la siin.

d. Xubinna fadhiga Golaha uma qeybin karto qoraal aan oggolaansho looga haysan Guddoomiyaha Golaha.

r. Waxaa ka reebban xubnaha in ay ka baxaan fadhiga ama ay hadlaan iyadoo Gudoomiyuhu hadlayo ama codbixintu socoto.

s. Waxaa reebban in lala yimaado fadhiyada Golaha, calaamado, qoraallo, hal ku dhigyo iyo dhawaaqyo muujinaya is-hortaag hawlaha Golaha.

sh. Xilliga uu Guddoomiyuhu hoggaaminayo fadhiga xildhibaannadu uma tagi karaan, Xoghayaha ayaa loo marinyaa wixii fariin ah.

3. Xubinta hadlaysa waxay raacaysaa

tallaabooyinkan: -

b. Xubin walba waxay ku bilaabaysaa hadalkeeda ***"Mahadsanid Guddoomiye"***

t. Xubintu waxay isticmaaleysaa ***"Xildhibaan"*** marka ay sheegayso Xubin kale ***"Mudane, Marwo"***

j. Xubinta rabta inay ka qayb qaadato doodda waxay taageysaa gacanta, iyadoo aan qaylin, kicin ama ficil kale samayn, si loo diiwaangeliyo.

x. Marka ay dhammaato diiwaangelintu, xubin kale dib lagama diiwaan gelin karo, waxaana doodda ka qayb-qaadanaya xubnihii is-diiwaan- geliyey oo keliya.

kh. Xubintii hadasha iyadoo aan Guddoomiyuhu u oggolaan wuu ka joojinayaa hadalka, wuxuuna siinayaa xubintii hadalka lahayd.

**QODOBKA 49-AAD:**
**KHUDBADAHA**

1. Xubin kasta oo ka tirsan Golaha waxay xaq u leedahay in ay khudbad ka horjeediso fadhiyada Golaha diiwaangelin iyo oggolaanshaha Gudoomiyaha ka dib.
2. Mudanaha doonaya in uu hadlo, waa in la diiwaangeliyaa, Guddoomiyuhu wuxuu madasha hadalka ku soo dhaweynayaa khudbad-

jeediyayaasha sida ay isugu xigaan

3. Khudbada mudanuhu kama badnaan karto toban (10) daqiiqo.
4. Haddii mudane laba jeer loo digo inuu ku soo noqdo anshaxa habboon ama aan waqtiga la siiyey ku dhamayn khudbadiisa sida ku xusan farqada 3-aad ee isla qodobkan, Gudoomiyuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu hadalka ka joojiyo.
5. Guddoomiyaha Golaha ayaa u oggolaan kara xubin inay hadasho wakhti ka badan mudada la siiyey haddii uu macquul u arko.

## QODOBKA 50-AAD:
## DHEX-GAL TOOSINEED

1. Mudane kasta wuxuu codsan karaa dhex gal toosineed, iyadoo xubin kale hadalka wadato.
2. Guddoomiyuhu wuxu siin karaa fursad xubinta ka codsata dhex gal toosineed, haddii uu u arko mid ku habboon.
3. Marka la aqbalo dhexgalka toosineed xubintu waxay si toos ah uga hadlaysaa qodobka uu u istaagay iyadoo koobaysa, kama hadli karo arrin ka baxsan mawduuca laga hadlayo.

## QODOBKA 51-AAD:

## XAQA JAWAAB-CELINTA XUBNAHA

1. Xildhibaan ama Wasiir, waxay xaq u leeyihiin in ay isla markiiba jawaab ka bixiyaan doodda/hadal lagu soo qaaday magaciisa.
2. jawaab celinta waxaa lagu xadidayaa laba (2) daqiiqo.
3. Haddii Xildhibaan ama wasiirka loo tixgeliyo xaqa ay u leeyihiin in ay jawaab celiyaan iyadoo la raacayo farqada koowaad ee qodobkan, jawaab celin hal (1) daqiiqo ku kooban ayaa la siinayaa hadal jeediyihii hore ee la tixraacay.

## QODOBKA 52-AAD:
## WARBIXINNADA WASIIRADA

Guddomiyaha Golaha oo u oggolaaday Wasiir in uu hadal ka jeediyo arrin hoos imaanaysa waajibaadkiisa shaqo, ka dib markuu hadalka jeediyo Guddoomiyaha Goluhu wuxuu oggolaanayaa wixii feker ku biirin ah ama su'aalo ah ee Goluhu u qabo ama xubin ka mid ah Golaha, wasiirka hadalka jeediyey wuxuu xaq u yeelanayaa in uu jawaab kooban ka yiraahdo wixii feker ku biirin ah ama su'aalo ah ee la soo jeediyey.

## QODOBKA 53-AAD:
## NIDAAMKA FADHIGA GOLAHA

1. Guddoomiyaha Golaha ayaa ilaalinaya nidaamka fadhiga Golaha wuxuuna soo jeedin karaa in ay nidaamka ilaaliso xubin kasta oo Golaha Wakiillada ama xukuumadda ka tirsan markii: -

b. Xubin ay ka baxdo arrintii doodu ka furnayd.

t. Xubin ay ku kacdo fal carqaladeynaya nidaamka shaqada Golaha.

j. Xubintu ay ku kacdo anshax xumo ama dhaqan aan habboonayn.

x. Xubin ay huriso colaad, anshax xumo, gef, sharaf dil, hanjabaad IWM.

Kh. xubintu ay garab marto ama ixtiraami weydo awoodda xil-gudashada Guddoomiyaha Golaha

2. Xubin ama wasiir waa inay u hogaansanto amarka uu bixiyo Guddoomiyaha Golaha oo ku saabsan hab-dhaqanka loogu baaqay xubintaas ama wasiirkaas in ay dhowrto, oo ay ka mid yihiin tallaabooyinka soo socda: -

   b. In isla markaasba soo afjaro hadalka.

   t. In uu ka noqdo gefkii uu sameeyey ee aan ku habboonayn Golaha.

   x. Fadhiga Golaha oo laga saaro inta maalintaas ka hartay.

3. Haddii Golaha dhexdiisa ay ka dhalato nidaam darro aad u baaxad weyn, Guddoomiyaha Goluhu wuxuu isla markiiba dib u dhigi karaa fadhiga

maalintaas isagoo la tashaday ku xigeennada.

## QODOBKA 54-AAD:
## DAAH-FURNAANTA FADHIYADA GOLAHA

1. Fadhiyada Golaha waxay u furan yihiin dadweynaha, hadduusan Goluhu si kale u go'aamin Fadhiyada Golaha waxaa lala socodsiinayaa warbaahinta.
2. Dadka loo oggolaaday inay ka qeyb galaan waa in ay fariistaan meel khaas ah oo ka soocan kuraasta xubnaha, waa in ay aamusnaadaan ayna muujin calaamad aqbalaad ama diidmo.
3. Dadka loo oggolaaday inay dhegaystaan doodaha, waa in ay hastaan kaarka martida ayna muujiyaan wakhti kasta lagana uruuriyo dhammaadka fadhiga ka dib.
4. Marti/Dhegeyste kasta ee u gefa sharafta iyo karaamada Golaha ama xubin ka tirsan Golaha waxaa lagu wargelinayaa saraakiisha amniga si tallaabo sharciga waafaqsan looga qaado.

## QODOBKA 55-AAD:
## AMNIGA XARUNTA GOLAHA

1. Nabadgelyada Xarunta Golaha iyo tan fadhiyada waxaa u xilsaaran ciidanka nabadgelyada ee loo igmaday.
2. Waxaa ka reebban qof kasta inuu hoolka shirarka Golaha la galo hub, haddii xubin Golaha ka tirsan

uu diido in uu hubka ku wareejiyo ciidamada amniga, Guddoomiyaha Guddiga Amniga iyo Nabadgeylyada Golaha ayaa la ogaysiinayaa, haddii xubintaasi ay ku adkaysato in ay dhinac marto talada Guddoomiyaha amniga waxaa arrintaa loo gudbinayaa Guddoomiyaha si xubintaa tallaabo ku habboon looga qaado.

3. Ciidanka amniga ma geli karo Hoolka shirarka haduusan Guddoomiyuhuka codsan in ay soo fara geliyaan.
4. Cid ka baxsan Xubnaha Golaha Wakiillada ama shaqaalaha Maamulkama soo geli karaan Xarunta Golaha, haddii aysan fasax ka haysan Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada.

## QODOBKA 56-AAD:
## KAYDINTA IYO XAFIDAADDA QORAALLADA FADHIYADA GOLAHA

1. Hadal qoraalka ayaa noqonaya kaydinta rasmiga ah ee waxa uu qabtay Goluhu waxaana diyaarinaya Xoghayaha Guud oo kaashanaya Shaqaalaha.
2. Hadal qoraalka fadhiyada Golaha waxaa saxiixaya Xoghayaha Guud ee Golaha si uu u xaqiijiyo in uu sax yahay.
3. Hadal qoraalka waxaa lagu xusayaa: -

b. Lambarka fadhiga
t. Wakhtiga iyo goobta fadhiga lagu qabtay
j. Cidda hogaaminaysa fadhiga

x. Xubnaha ka soo qeyb galay, haddii ay joogeen ilaa geba-gabada fadhiga ama ay joogeen qeyb ka mid fadhiga.

kh. Xubnaha maqan ee fasax qaatay.

d. Xubnaha maqan ee aan fasax qaadan.

r. Ajandaha Maalintaas.

s. Soo koobidda arrimaha laga hadlayo iyo

Go'aamada lagu gaaray fadhiga.

Sh. Wakhtiga la xiray fadhiga.

Dh. Go'aammada Guddoomiyaha ee la xiriira habraaca oggolaansha soo jeedinta inta uu Fadhigu socday.

4. Nuqul rasmiga ah ee hadal qoraalka waxaa keydinaya Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada.

5. Geba-gabada fadhi kasta hadal qoraallada iyo dukumintiyada kale waxaa lagu keydinayaa, keydka Golaha iyo bogga internet-ka si ay ula socdaan dadweynuhu

## CUTUBKA 7-AAD:
## CURINTA HINDISE SHARCIYEEDKA

### QODOBKA 57-AAD:
### SOO BANDHIGIDDA HINDISE SHARCIYEED

Waxaa hindise sharciyeed soo bandhigi kara:-

1. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Wakiillada.

2. Golaha Xukuumadda.
3. Tiro muwaadiniin ah oo aan ka yarayn shan kun (5,000) oo cod bixiyayaal ah, marka laga reebo Hindise sharciyeed la xiriira Miisaaniyad sannadeedka, taasoo ka imaanaysa Golaha Xukuumadda.

**QODOBKA 58-AAD:**
**AKHRINTA HINDISE SHARCIYEEDKA**

1. Hindise sharciyeed waliba waa in xubnaha Golaha loo qeybiyo 48 saac ka hor inta uusan marin akhrinta koowaad.
2. Soo badhigida hindise sharciyeed cusub waxay ka gudbaysaa akhrinta koowaad, haddii aan laga keenin wax dood ah, wax ka bedelid ama su'aal.
3. Hindise sharciyeed kasta ee la keeno Golaha waa in ay ku lifaaqan yihiin arrimaha soo socda: -

b. Faah-faahin ku saabsan arrimaha sharcigu xallinayo, ujeedooyinka iyo in uu waafaqsan yahay dastuurka

t. Caddeyn ku saabsan saamaynta dhaqaale ee sharcigu leeyahay sanadka koowaad iyo mustaqbalkaba.

4. Akhrinta koowaad ee hindise sharciyeedku waxay dhammaystirmaysaa marka Guddiga hawshaas u xilsaaran lagu wareejiyo xeerka qabyada ah.

5. Akhrinta labaad waxaa ku samaynaya Guddiga u xilsaaran, isagoo la tashanaya qeybta fulinta ee uu khuseeyo iyo daneeyayaasha bulshada, iyagoo ku soo daraya wax ka bedelka ay sameeyeen, waxayna horkeenayaan Golaha Wakiillada.
6. Akhrinta saddexaad waxaa loo gudbayaa marka la dhamaystiro warbixinta Guddiga, iyadoo ay bilaabmayso dooda Golaha iyo ka go'aan qaadashada xeerkaas.

## QODOBKA 59-AAD:
## HINDISE SHARCIYEED SUGAYA SAXIIX

Xeerka qabyada ah wuxuu noqonayaa Xeer rasmi ah, marka Golaha Wakiilladu ansixiyo iyadoo loo hoggaansamayo Xeer-hoosaadka, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha Dawladda Puntland laguna soo saaro Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

## QODOBKA 60-AAD:
## XEER LA DIIDEY

Xeerka qabyada ah oo ay Golaha Wakiillada diideen, dib looguma soo celin karo isla kalfadhiga markaas socda sida ku cad qodobka **70-aad** faqradiisa **3-aad** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

## QODOBKA 61-AAD:
## DAABACAADDA IYO KAYDINTA XEERARKA

1. Garyaqaanka Guud ee Dawladda Puntland ayaa

masuul ka noqon doona ilaalinta kaydka Xeerarka uu ansixiyay Golaha iyo ku daabacidda faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

2. Saddexda nuqul ee asalka ah waxaa lagu kaydinayaa Xafiiska Madaxtooyada, Golaha Wakiillada iyo Garqaanka Guud ee Dawladda Puntland, sida ku cad Qodobka **71-aad** faqradiisa **2-aad** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

## CUTUBKA 8-AAD:
## GUDDIYADA GOLAHA

### QODOBKA 62-AAD:
### GUDDIYADA GOLAHA WAKIILLADA

1. Golaha Wakiilladu wuxuu yeelanayaa guddiyo si uu waajibaadkiisa u guto.
2. Xilka iyo waajibaadka guddiyadu waxay ku qeexan yihiin qodobada **62.1 ilaa 62.10 ee xeer-hoosaadka.**
3. Guddi kasta waxaa waajib ku ah inay Golaha u soo gudbiyaan warbixin la xiriirta xilka iyo waajibaadka Goluhu u idmaday.
4. Guddi kasta wuxuu yeelanayaa guddoomiye xubin ka ah guddiga joogtada ah oo lagu soo doortay si waafaqsan qodobka 12-aad ee xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada.

5. Go'aannada guddiga waxaa saxiixa guddoomiyaha guddiga, haddii uu maqan yahayna guddoomiye ku-xigeenka.
6. Haddii laba guddi ama wax ka badan ay dabeecadda shaqadoodu isku mid noqoto, waxay si wada jir ah ku soo gudbinayaan aragtidooda, waxaana mas'uuliyadda iyo waqtiga u cayimaya guddoomiyaha Golaha Wakiillada.

## 62.1: GUDDIGA SHURUUCDA, CADDAALADDA, ARRIMAHA DIINTA IYO DASTUURKA

1. Wuxuu ilaalinayaa Dastuurka, Xeerarka Dalka iyo Go'aamada Goluhu ansixiyo.
2. Hubinta in Xeerkii Golahu ansixiyey lagu soo saaray faafinta rasmiga ah.
3. Ururinta xogaha la xiriira xeerarka aan la hirgelin ama aan sidoodii loogu dhaqmin.
4. Soo jeedinta ciddii jabisa Dastuurka iyo Xeerarka Dalka.
5. Soo jeedinta wax ka bedelka Xeerar Goluhu horey u ansixiyey oo u baahan in wax laga bedelo.
6. Dhiirigelinta arrimaha Garsoorka iyo Caddaalada.
7. Ka warbixinta xaaladaha maxaabiista iyo xabsiyada dalka.
8. Fududaynta xeerarka Golaha la horkeeno
9. Xaqiijinta la dagaallanka anshax xumada iyo

mukhaadaraadka.

10. Ka talo bixinta wax ka bedelka dastuurka iyo soo jeedinta is-waafajinta kan federaalka.
11. La socodka iyo ka warbixinta arrimaha Diinta iyo Awqaafta Puntland.

### 62.2: GUDDIGA SIYAASADDA, QORSHEYNTA, HORUMARINTA DHAQAALAHA & XIRIIRKA CAALAMIGA AH

1. La socodka iyo hubinta habka wada shaqeynta DPL iyo dawladda federaalka.
2. U soo gudbinta Golaha xaaladaha siyaasadeed ee Dawladda Puntland iyo Dawladda Federaalka.
3. Hubinta in siyaasadda dawladda tahay mid ka tarjumaysa danaha iyo daryeelka bulshada Puntland.
4. Ka talo bixinta siyaasadda iyo istaraatiijiyada wada shaqeynta qeybaha dawladda.
5. Hubinta iyo ka qeyb galka hawlaha dib loogu dhisayo dalka.
6. Hubinta habsami u socodka Qorshaha dawladda ee xiriirka caalamiga ah.
7. Ka talo bixinta dhacdooyinka arrimaha dibada ee ka hor-imaanaya siyaasadda dawladda Puntland.
8. La socodka siyaasadda dawladda ee ku wajahan socdaalka iyo jinsiyadaha.
9. Ka talo bixinta wax wada qabsiga iyo daris

wanaagga maamullada kale iyo wadamada aan dariska nahay

10. Isku xirka Dawladda Puntland iyo jaaliyadaha dibedda.
11. Xoojinta xiriirka iyo wax wada qabsiga Golaha Wakiillada iyo Baarlamaannada caalamiga ah.
12. Ka talo bixinta arrimaha tirakoobka.
13. La socodka iyo ka warbixinta saboolnimada, shaqo la'aanta iyo xaaladda dhaqan dhaqaale ee bulshada.

## 62.3. GUDDIGA ANSHAXA IYO ARRIMAHA GOLAHA

1. La socodka iyo hubinta habsami u socodka hawlaha Golaha.
2. Ilaalinta anshaxa iyo hab-dhaqanka suubban ee Golaha.
3. La socodka iyo talo ka bixinta daryeelka xubnaha iyo shaqaalaha Golaha.
4. Ka go'aan qaadashada anshax marinta xubnaha Golaha Wakiillada markii Guddoonku u soo gudbiyo.
5. Tayeynta aqoonta xubnaha Golaha Wakiillada iyo shaqaalaha.
6. Hubinta iyo xaqiijinta xubnaha cusub ee ku soo

biiraya Golaha in ay dhammaystireen habraaca sharci ee ay ku timid xubintii ka horeysay.

## 62.4 GUDDIGA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA IYO DIMUQRAADIYADDA

1. La socodka ururinta iyo ka talo bixinta xaaladaha gobollada iyo degmooyinka.
2. Hubinta iyo la socodka dhismayaasha golayaasha deegaanka ee degmooyinka.
3. Kormeerka goobaha ay ka dhacaan aafooyinka dabiiciga ah.
4. Ka warbixinta dadka ku waxyeeloobay aafooyinka dabiiciga ah iyo la xisaabtanka hay'adaha qaabilsan.
5. La socodka iyo ka warbixinta arrimaha dimuqraadiyadda iyo doorashooyinka.

## 62.5 GUDDIGA AMNIGA IYO NABADGELYADA

1. Kormeerka iyo la socodka xaaladaha nabadgelyo iyo amni ee dalka.
2. Ururinta dhacdooyinka nabadgelyo iyo amni xumo ee u baahan in degdeg wax looga qabto.
3. Kormeerka iyo talo siinta hay'adaha qaabilsan amniga.
4. Ka warbixinta xaaladaha nabadgelyo iyo amni ee gobollada iyo degmooyinka dalka.

5. La socodka xaaladaha iyo tayada ciidamada Puntland.
6. La socodka xaaladaha tahriibta iyo la dagaallanka burcad badeedka.
7. La socodka iyo ka warbixinta arrimaha socdaalka iyo jinsiyadaha.

## 62.6: GUDDIGA MAALIYADDA, DHAQAALAHA IYO XISAABAADKA

1. La socodka siyaasadda dhaqaalaha iyo xisaabaadka Dawladda.
2. Hubinta ku dhaqanka Miisaaniyadda iyo beekhaaminta kharashka dawladda.
3. Ka warbixinta xaaladda dhaqaale ee Puntland.
4. Daba-galka iyo la xisaabtanka hay'adaha dhaqaalaha qaabilsan ee dalka.
5. Ka qeyb-qaadashada qorshaha miisaaniyadda ee Golaha Wakiillada.
6. U-kuur-galka siyaasadda cashuuraha iyo dakhliga.

## 62.7 GUDDIGA HAWLAHA GUUD, GAADIIDKA, GANACSIGA IYO KAABAYAASHA DHAQAALAHA

1. La socodka ganacsiga gudaha iyo dibedda ee dawladda Puntland.
2. La socodka iyo xog-ogaal u noqoshada wax soo saarka warshadaha dalka.
3. U-kuurgelidda iyo kormeeridda xaaladaha

garoomada, dekedaha, marsooyinka iyo gaadiidka badda.

4. Kormeeridda hay'adaha qaabilsan horumarinta waddooyinka iyo korontada.
5. La socodka dhismayaasha, qandaraasyada iyo mashaariicda dawladda Puntland.

## 62.8: GUDDIGA ARRIMAHA BULSHADA, DHAQANKA, WARFAAFINTA IYO ISGAARSIINTA

1. La socodka xaaladaha adeegyada bulshada, caafimaadka iyo waxbarashada.
2. Soo jeedinta dhibaatooyinka arrimaha bulshada ee u baahan in degdeg wax looga qabto.
3. Kormeerka, qiimaynta iyo ka talo bixinta adeegyada bulshada.
4. Hubinta ku barbaarinta ubadka soo koraya dhaqanka suubban iyo mabaadiida Diinta Islaamka.
5. La socodka xaaladda shaqada iyo shaqaalaha.
6. Dhiiri gelinta iyo horumarinta dhallinyarada iyo cayaaraha.
7. Dhiiri gelinta saxaafadda iyo is-gaarsiinta casriga ah.

## 62.9 GUDDIGA ARRIMAHA DEEGAANKA IYO KHAYRAADKA DABIICIGA AH

1. Ka talo bixinta la dagaalanka xaalufinta dhirta, xoolaha iyo duur-joogta.
2. Kormeeridda iyo hubinta wax soo saarka kalluumaysiga & beeraha.
3. La socodka, ururinta iyo talo ka bixinta dhibaatooyinka ka jira deegaanka iyo bay'ada.
4. La talinta iyo soo jeedinta tilmaamo ama awaamiir lagaga hortagayo qashin warshadeed halis ah oo lagu qubo badda ama lagu aaso berriga iyo wasakhda hawada doorisa iyo dhammaan waxyaabaha dhaawaca khayraadka dabiiciga iyo cimilada.
5. Kormeeridda hay'adaha u xilsaaran arrimaha deegaanka iyo bay'ada.
6. Ka qayb galka wacyi gelinta dadweynaha ee badbaadada deegaanka iyo bay'adda.
7. Kormeeridda, la socodka iyo ka talo bixinta biyaha iyo khayraadka dabiiciga ah ee Puntland.
8. Kormeeridda, la socodka iyo ka talo bixinta xaaladda caafimaadka xoolaha.

## 62.10: GUDDIGA XUQUUQDA INSAANKA, HAWEENKA IYO ARRIMAHA QOYSKA

1. La socodka iyo ka warbixinta meel ka dhacyada lidka ku ah xuquuqda aadanaha ee ka dhaca Puntland.

2. La socodka arrimaha qoyska iyo horumarinta haweenka.
3. U kuurgelidda dhibaatooyinka haweenka iyo qoyska.
4. Dhiiri gelinta waxbarashada haweenka iyo dhallaanka.
5. U doodista agoomaha iyo ubadka aan waalidka lahayn.
6. Dhiiri gelinta naas-nuujinta iyo nafaqeynta caruurta.
7. La socodka iyo u qareemidda xuquuqda caruurta.
8. La socodka baaqyada caalamiga ah ee xuquuqda insaanka.

## CUTUBKA 9-AAD:
## HABRAACA MIISAANIYADDA

### QODOBKA 63-AAD:
### HABRAACA LAGU ANSIXINAYO MIISAANIYADDA

1. Xukuumaddu waxay u gudbinaysaa Golaha Wakiillada qabyo qoraalka Miisaaniyadda ee sanadka soo socda ugu dambayn 20-ka Noofember ee sannad walba, iyadoo ay weheliso qoraal faah-faahinaya miisaaniyadda qabyada ah.
2. Guddoomiyaha Goluhu wuxuu u gudbinayaa Xubnaha qabyo qoraalka miisaaniyadda iyo

qoraalada kale ee la xiriira miisaaniyadda qabyada ah.

3. Warbixinta ku saabsan miisaaniyadda iyo qabyo qoraalka miisaaniyadda wasiirka maaliyadda ayaa ka hor akhrinaya fadhiga Golaha loogamana doodayo fadhigaas.
4. Si guud ayaa Goluhu u akhrinayaa Miisaaniyadda waxaana loo gudbinayaa Guddiga Maaliyadda, Dhaqaalaha iyo Xisaabaadka.
5. Guddiga Maaliyadda, Dhaqaalaha iyo Xisaabaadku wuxuu qabanayaa dhegaysiyo Golaha, Wasaaradda iyo hay'adaha kale ee dawladda inta aan la soo geba-gabayn warbixinta Miisaaniyadda.
6. La tashi iyo dhegaysi ka dib Guddiga Maaliyadda isagoo Guddoonka ogaysiinaya wuxuu u gudbinayaa Wasaarada Maaliyadda is bedellada lagu sameeyey madaxyada Miisaaniyadda.
7. Guddiga Maaliyadda, Dhaqaalaha iyo xisaabaadku wuxuu mawqif ka qaadanayaan qabyo qoraalka miisaaniyadda ee wax ka bedelka lagu sameeyey ama aan lagu samayn, ka dibna warbixintiisa u gudbinayaa Golaha Wakiillada.
8. Golaha Wakiillada ayaa ka doodaya ka dibna u codaynaya qabyo qoraalka miisaaniyadda ee sannadlaha ah.
9. Haddii qabyo qoraalka miisaaniyadda la ansixin waayo, Goluhu wuxuu xukuumadda u qabanayaa

in ay muddo 30-cisho ah gudahood ku soo gudbiso qabyo qoraal miisaaniyadeed cusub.

## QODOBKA 64-AAD: HABKA LOO ANSIXIYO XISAAB-XIRKA MIISAANIYADDA

1. Xukuumadda ayaa soo gudbinaysa warbixinta xisaab xir sanadeedka miisaaniyadda Dawladda Puntland ee sanadkii la soo dhaafay, warbixinta waxaa la horgeynayaa Golaha si uu uga doodo, u ansixiyo ama u diido.
2. Guddoomiyaha Goluhu wuxuu u gudbinayaa warbixinta xisaab xirka Guddiga Maaliyadda, Dhaqaalaha iyo Xisaabaadka ka hor inta uusan Goluhu ka doodin.
3. Guddiga Maaliyadda, dhaqaalaha iyo xisaabaadku marka uu soo geba- gabeeyo warbixintiisa iyo talo soo jeedinta, Golaha ayaa ka doodaya una coddeynaya Xisaab xirka.

# CUTUBKA 10-AAD: KORMEERADA DOWLADDA

## QODOBKA 65-AAD: U YEERIDDA GOLAHA WASIIRADA

Goluhu wuxuu u yeeri karaa Golaha Wasiirada mid

ka badan ama dhammaantood, si wax looga weydiiyo hawlaha loo igmaday, haddii mas'uul loo yeeray cudur daar la'aan ka baaqsado in uu hortago Golaha ama Guddi hoosaadyadiisa, Goluhu wuxuu wargelinayaa Madaxweynaha waxaana loo qaadayaa codka kalsoonida.

## QODOBKA 66-AAD:

## CODKA KALSOONI KALA NOQOSHADA WASIIRADA

1. Golaha Wakiilladu wuxuu kalsoonida kala noqon karaa wasiirada mid, ka badan ama dhammaantood.
2. Kalsooni kala noqoshada Wasiirada waxaa soo jeedin kara ugu yaraa (6) xildhibaan.
3. Ka doodida mooshinka kalsooni kala noqoshada wasiirada waa in ay oggolaadaan ugu yaraan saddex meelood oo meel (1/3) Xildhibaannada Golaha.
4. Kala bar lagu daray hal (1/2 +1) tirada Xubnaha Golaha ayaa kalsoonida kala noqon karta Wasiiirada.
5. Haddii codka kalsooni kala noqoshada uu meel maro, Madaxweynuhu waa in uu magacaabo bedelka Golihii ama wasiirkii codka kalsoonida waayey, Goluhu hawshiisu waa uu sii wadanayaa

ilaa Gole cusub laga magacaabo, hase yeeshee ma bilaabi karaan barnaamij cusub.

6. Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay in uu hal mar Golaha Wakiillada dib ugu celiyo magacaabista Xubnaha Golaha Xukuumadda ee kalsoonida waayey.
7. Haddii ay xukuumaddu dhacdo, Madaxweynuhu wuxuu 21-bari gudaheed Golaha Wakiillada ku horgeynayaa xukuumad cusub si loo ansixiyo.

## QODOBKA 67-AAD:
## DIIDMADA CODKA KALSOONI KALA NOQOSHADA

Haddii mooshinka codka kalsooni kala noqoshada Golaha Xukuumadda uu diido Golaha Wakiilladu, isla mooshinkaa lama horkeeni karo Golaha Wakiillada kalfadhiga markaa socda.

## QODOBKA 68-AAD:
## KORMEERKA GUDDIYADA GOLAHA WAKIILLADA

1. Si loo xaqiijiyo dhaqangelinta go'aamada Golaha, Guddiyada Goluhu waxay la xisaabtamayaan, ayna kormeerayaan hawlaha waaxyaha dawladda iyo hay'adaha kale ee

hoos yimaada xilalkooda iyo waajibaadkooda.

2. Haddii wasaarad ama hay'ad kale ee hoos timaada shaqada Guddiyada Golaha warbixin keeni waydo ama warbixinteedu aysan dhammaystirnayn marka uu Guddigu uu sameeyo codsi waxaa arrintaa lagu dari karaa ajandaha Golaha.
3. Guddiyadu waxay warbixintooda u soo gudbinayaan Golaha, waxayna noqonaysaa qoraal iyo hadal labadaba.

## QODOBKA 69-AAD:
## HABRAACA DHAQAALAHA GOLAHA WAKIILLADA

1. Goluhu wuxuu yeelanayaa Miisaaniyad u gaar ah, taasoo lagu salaynayo qorshe hawleedka Golaha.
2. Dhaqaalaha Golaha Wakiillada waxaa mas'uul ka ah Guddoonka, Xoghayaha Guud iyo Agaasimaha Waaxda Maamulka.
3. Dhaqaalaha Golaha Wakiillada waxaa loo qoondeynayaa Miisaaniyad ay samaynayaan Guddoonka, Guddiga Maaliyadda, Xoghayaha Guud ah iyo Agaasimaha Waaxda Maamulka, waxaana laga ansixinayaa Golaha Wakiillada.
4. Miisaaniyadda loo qoondeeyey Golaha Wakiillada waxaa lagu shubayaa xisaab Bangi oo laga furayo bangiga dawladda, iyadoo miisaaniyadda guud ee

dalka boqolayda (%) ay ka tahay loo eegayo

5. Dhaqaalaha Golaha Wakiillada waxaa loo maamulayaa hab waafaqsan nidaamka xisaabaadka dawladda.
6. Goluhu wuxuu yeelanayaa Hanti-dhowre u gaar ah (internal Auditor) oo u xilsaaran baarida iyo dabagalka hantida Golaha Wakiillada.

## CUTUBKA 11AAD:
## MAAMULKA GOLAHA WAKIILLADA

### QODOBKA 70-AAD:
### XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA WAKIILLADA

1. Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada waxaa magacaabaya Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ka dib markuu la tashado Guddoomiye Ku-xigeennada.
2. Waa sarkaalka ugu sareeya ee u xilsaaran shaqada iyo arrimaha maamulka ee Golaha
3. Wuxuu mas'uul ka yahay kormeerka, qiimaynta shaqada, hawlgelida, amarkiisana ayey ku shaqeynayaan shaqaalaha Goluhu.
4. Wuxuu ururiyaa diiwaangeliyaa hadal qoraalka kalfadhiga iyo shirarka Guddiga Joogtada ah.
5. Waa mas'uul ka mid ah mas'uuliyiinta dhaqaalaha Golaha.

6. Fadhi maalmeed walba marka la furayo waa in Xoghayaha Guud sheegaa tirada xubnaha fadhiya, kuwo fasax ah iyo kuwa maqan.
7. Wuxuu diiwaangeliyaa xeerarka, go'aamada fadhiyada, qoraallada iyo go'aammada Guddiga Joogtada ah.
8. Wuxuu diiwaangeliyaa hantida Golaha.
9. Wuxuu tiriyaa codadka Golaha, isagoo u kaashanaya shaqaalaha Golaha Wakiillada.
10. Wuxuu ka kaaliyaa Guddoonka hagidda shirkarka iyo fadhiyada Golaha.
11. Wuxuu ka qeyb qaataa kulamada Guddiga joogtada ah, ra'yigiisana waa ka dhiiban karaa mase codeyn karo.
12. Waa xiriiriyaha Golaha, Golayaasha kale ee Dawladda iyo Hay'adaha Caalamiga ah.
13. Wuxuu xaqiijinayaa in xubnaha la ogaysiiyey wakhtiga kalfadhiyada iyo fadhiyada.
14. Wuxuu shaqaalaha u kala cayimayaa hawlo gaar ah xilliyada kalfadhiyada, fadhiyada Golaha iyo Guddiyada.
15. Qoondeynta Qadarka lacageed ee ay qaataan shaqaalaha ee qabtay shaqooyin kala duwan oo waajibaadkooda la xiriira.
16. Xoghayaha Guud ayaa soo jeedinaya qorista,

dalacsiinta, ruqsaynta, hoos u dhigista, kala bedelka iyo shaqo ka joojinta shaqaalaha Golaha Wakiillada, waxaana Go'aan ka gaaraya Guddoomiyaha Golaha Wakiillada markuu la tashado Guddoomiye ku xigeennada.

## QODOBKA 71-AAD:
## SHURUUDAHA LAGU XULANAYO XOGHAYAHA GUUD

1. Waa inuu yahay muwaadin Soomaali Puntland u dhashay.
2. Waa inuu leeyahay dabeecad iyo dhaqan wanaagsan.
3. Waa inuu haystaa ugu yaraan shahaado heer jaamacadeed ah.
4. Waa inuu yaqaanno Af-soomaali, kuna hadli karaa, qorina karaa Carabi iyo Ingiriisi.
5. Waa inuu leeyahay waayo-aragnimo shaqo oo gaarsiisan ugu yaraan shan (5) sano.
6. Waa inuu yahay qof lagu aamini karo sirta iyo qoraallada Golaha.

## QODOBKA 72-AAD:
## SHAQAALAHA GOLAHA WAKIILLADA

1. Waxay qayb muhiim ah kaga jiraan Shaqaalaha rayidka ah, waxay si toos ah ula shaqaynayaan Golaha Wakiillada, iyadoo loo eegayo baahidiisa

iyo xaaladaha shaqo.

2. Shaqaalaha Baarlamaanka waxaa lagu dhaqayaa xeerka Shaqaalaha Puntland. Waajibaadkooda iyo masuuliyadaha la xiriira shaqadooda waxaa lagu qeexayaa xeer nidaamiye gaar ah oo ay ansixiyaan Golaha Wakiilladu.
3. Shaqaaluhu waa caawiyayaasha Golaha Wakiillada waxayna hoos imanayaan amarka, kormeeridda iyo qiimaynta Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada.
4. Qiimaynta shaqo qabashada, dallacsiinta, tallaabooyinka anshax iyo wareejinta shaqaalaha waa inay waafaqdo nidaamyada maamul ee shaqaalaha dawladda.

## QODOBKA 73-AAD:
## ANSIXINTA XAALADDA DEGDEGGA AH

Golaha Wakiilladu wuxuu ansixin karaa ama uu sii dheerayn karaa Xaalad Deg-deg ah, sida ku cad Qodobka-29-aad Faqradaha 4-aad iyo 5- aad ee Dastuurka Puntland.

## QODOBKA 74-AAD:
## HABRAACYADA GOLAHA WAKIILLADA

1. Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilladu wuxuu dhaqan gelayaa marka ay meel mariyaan aqlabiyadda

Xubnaha Golaha, isla markaana uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu.

2. Xeer-hoosaadka waxaa wax looga bedeli karaa mooshin ay soo jeediyeen Guddiga Shuruucda, Caddaaladda, Arrimaha Diinta iyo Dastuurka oo lagu taageeray saddex meelood laba meelood (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada

## QODOBKA 75-AAD:
## WAX-KA-BEDELKA XEER-HOOSAADKA

Wax-ka-bedelka lagu sameeyey Xeer-hoosaadka wuxuu ku ansaxayaa marka ay isku raacaan kala bar lagu daray hal (1/2 +1) tirada Xubnaha Golaha Wakiillada.

## QODOBKA 76-AAD:
## DHAQAN-GALKA XEER-HOOSAADKA

Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilladu wuxuu dhaqan geleyaa  marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Guddoomiyaha Golaha Wakiilladuna Saxiixo.





**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jirbiil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Dawladda Puntland**